LOCAL 925
SEIU
Stronger Together

2009-2011

HESHIISKA GUUD
WUXUU U DHAXEEYAA

GOBOLKA WASHINGTON

IYO

URURKA SHAQAALAHA
CAALAMIGA AH EE XAFIISKA 925

LAGA BILAABO
1-DA JULAAY, 2009 ILAA 30-KA JUUN 30, 2011

THE SEAL OF THE STATE OF WASHINGTON 1889

SEIU XAFIISKA 925 SHAQAALAHA XANNAANNADA CARRUURTA
1-DA JULAAY 2009 – 30-KA JUUN 2011

QODOBKA	CINWAANKA	BOGGA
	GOGOLDHIG	
QODOBKA 1	**AQOONSIGA URURKA SHAQAALAHA**	**1**
1.1	Aqoonsiga Ururka Shaqaalaha	1
1.2	Midnimada Kooxda Heshiiska	1
QODOBKA 2	**MIDABTAKOOR LA'AAN**	**1**
QODOBKA 3	**XUQUUQDA WAALIDKA/MASUULKA**	**1**
3.1	Yaa Noqon Kara Waalid/Masuul	1
3.2	Xuquuqda Waalidka/Masuulka	1
3.3	Macluumaadka Khuseeya Waalidka/Masuulka	2
3.4	Sida Loo Xafidayo Xogta Waalidka/Masuulka	2
3.5	Xuquuqda Aan Marna La Is Duudsiin Karin	2
3.6	Waalidka/Masuulka Aan Cabasho Sameyn Karin	2
QODOBKA 4	**XUQUUQDA URURKA SHAQAALAHA**	**2**
4.1	Waxyaabaha Ka Baxsan Xeerxayndaabka Ururka Shaqaalaha	2
4.2	Hawlaha Ururka Shaqaalaha	3
4.3	Wakiillada Ururka Shaqaalaha	3
4.4	Dhexdhexaadnimo	3
4.5	Liiska Shaqaalaha	3
4.6	Wacyigelinta Ururka Shaqaalaha	3
4.7	Ogeysiisyo Boorarka lagu Qoro	4
4.8	Ogeysiis	4
4.9	Soo-saaridda Heshiishyada	4
QODOBKA 5	**XUBIN KA NOQOSHADA IYO FAA'IIDOOYINKA URURKA SHAQAALAHA**	**5**
5.1	Faa'iidooyinka Ururka Shaqaalaha	5
5.2	Inaan Urur Lagu Biirin oo Xaq Leeyahay	5
5.3	Dhibaato La'aan Iyo Waxyeello La'aan	6
QODOBKA 6	**KHARASHKA URURKA LA ISAGA GOOYO, LACAGTA XAFIISKA, IYO LACAGTA SHAQAALAHA LAGU SOO BIIRIYO**	**6**
6.1	Kharashka Ururka	6
6.2	Waraaqaha Caddeymaha ah ee Shaqaalaha	6
6.3	Lacagta iyo Sida Wax Loogu Fulin doono	6
QODOBKA 7	**NIDAAMKA DACWADA**	**7**
7.1	Qeexid	7
7.2	Nidaamka Dacwada	8

QODOBKA	CINWAANKA	BOGGA
7.3	Mushaarka Caadiga ah iyo Mushaarka Dheeraadka ah	10
7.4	Shati-u-helidda iyo Arrimaha Sharciyada	10
QODOBKA 8	**SHIRARKA GUDDIGA SHAQAALAHA/MAAMULKA**	**10**
8.1	Guddiga Maamulka Shaqaalaha	10
QODOBKA 9	**SHURUUDAHA LA ISKA RABO**	**11**
9.1	Dakhliga oo La Soo Caddeeyo	11
9.2	Lama Oggola Shaqo-joojin Iyo In Shaqada Irridaha Loo Laabo	11
9.3	Dukumiintiga Qofka Shaqaalaha ah:	11
9.4	Waraaqaha oo La Turjumo iyo in Turjubaan La Diyaarsho	12
9.5	Xuquuqda Shaqaalaha	12
QODOBKA 10	**MUSHAAR-BIXINTA**	**12**
10.1	Mushaarka oo Aan Soo Daahin	12
10.2	Mushaarka oo Lagu Saleeyo Shaqadii La Qabtay	12
10.3	Shaqaalaha oo La Ogeysiisyo Kolka ay Shaqadu Ka Dhammaato	13
10.4	Kolka Mushaarku Khalad Galo	13
10.5	In uu Mushaarku Si Toos ah Koonto Ugu Dhaco	14
10.6	Isbeddalada Oggolaanshaha iyo Codsiyada Labaad	14
10.7	Wakhtiga Safarka Waalidka/Masuulka	14
QODOBKA 11	**LACAGAHA KALA DUWAN EE LA BIXIYO**	**14**
11.1	Lacagta Is-diiwaan-gelinta	14
11.2	Lacagta oo La Isku Siiyo Da'da Carruurta; Sicirka Lacagta Lagu Hayo Ilmaha Sida Fiican u Socda	15
11.3	Lacagta Lagu Qaadanayo Saacadaha Shaqada Ka Baxsan	15
11.4	Lacagta Lagu Aado Dibad-bax Waxbarasho ah	15
11.5	Baahida Gaarka ah	15
QODOBKA 12	**SICIRKA LACAGTA MUSHAARKA**	**16**
12.1	Sicirka Lacag-Kordhinta	16
12.2	Guddiga soo Jeediya Isbeddelka Sicirka lacagta	16
12.3	Shaqaalaha aan Shatiga Lagu Xirin Sicirka ay Heli Karaan Halkii Saac	16
12.4	Nidaamka Lacag-isu-celinta	16
QODOBKA 13	**DARYEELKA CAAFIMAADKA SHAQAALAHA**	**17**
13.1	Kharashka Caafimaadka Lagaa Bixinayo	17
13.2	Ujeeddada Caafimaadka Shaqaalaha	17
13.3	Lacagta Dowladdu Shaqaalaha Ku Soo Biiriso	17
13.4	Sida Arrin Xaq Loogu Yeesho	18
13.5	Dhibaato La'aan Iyo Waxyeello La'aan	19
13.6	Xisaabi Xil Ma Leh iyo Xaqiijinta Shaqada Wanaagsan	19
13.7	Hay'ad Kale oo Lagu Doorto Haynta Ammaanada	19
13.8	Ciddii Lagu Bedeli Lahaa Hay'adda Ammaanada ee SEIU 775 Trust	19

QODOBKA	CINWAANKA	BOGGA
QODOBKA 14	**TABABARKA IYO AQOON-KORORSIGA**	**19**
14.1	Tababarka – Shaqaalaha Shatiga leh	19
14.2	Shati-u-helidda iyo Tababarka Shaqaalaha aan Shatiga Lagu Xirin	20
14.3	Tababar Khasab ah oo Kaalmo Dhaqaale ku Xiran	21
14.4	Tababar Khasab ah oo ku Xiran Shati-u-helidda WACs	21
QODOBKA 15	**BARNAAMIJKA RAASHINKA**	**21**
QODOBKA 16	**FASAXYADA IYO MAALMAHA SHAQADA LAGA MAQNAADO**	**22**
16.1	Fasaxyada	22
16.2	Maalmaha Shaqada Laga Maqnaado	23
QODOBKA 17	**XUQUUQDA GOBOLKA**	**23**
17.1	Xuquuqda Maamulka Guud	23
17.2	Xuquuqda Gobolku Gaarka u Leeyahay	23
17.3	Waxyaabaha ka Baxsan	24
17.4	Dacwad Ku Oogista Gobolka	24
17.5	Fulinta Sharciga Waajibka ah	25
17.6	Waajibka Lagu Baayactami Karo	25
QODOBKA 18	**NIDAAMKA HESHIISKA**	**25**
18.1	Arrimaha Ku Lammaan Kunturaadda Lagu Heshiiyo	25
18.2	Nidaamka Heshiiska	25
QODOBKA 19	**HESHIIS BUUXA**	**26**

QORAALLADA SHARRAXAADDA AH

QORAALKA SHARRAXAADDA A **A-1**
Sicirka Lacagta Mushaarka

QORAALKA SHARRAXAADDA B **A-2**
Barnaamijyada Dhaqaale-kabista ah ee Looga Hadlayo Heshiiskan Guud

GOGOLDHIG

Heshiiskan waxaa wada galay oo uu u dhaxeeyaa Gobolka Washington (oo loogu yeerayo "Gobolka") iyo Ururka Shaqaalaha Caalamiga ah ee Xafiiska Local 925, (oo isna loogu yeerayo "Ururka Shaqaalaha ama SEIU"). Ururka Shaqaalaha iyo Gobolka waxa ay garawsadeen xiriirka lagama maarmaanka ah ee ku saleysan sharciga RCW 41.56, kaas oo dhigaya in uu gobolku yahay kan shaqada siiya shaqaalaha ku hawlan xannaannada carruurrta qoysaska iyada oo la isku raacayo in la sameysto heshiis guud. RCW 41.56 looma fasiran karo in uu yahay arrin uu Gobolku xukuumad ahaan faraha iskala gali karo xiriirka u dhaxeeya waalidka/masuulka iyo qofka shaqaalaha ah ee ku qoran xannaannada carruurta.

Labada dhinac waxa ay isku raaceen in ay fiiro gaar ah u yeeshaan arrimaha soo socda:

- Ururka Shaqaalaha iyo Gobolku waxa ka dhaxeeya qorshaha lagu xaqiijinayo in ay qoys walba oo deggan gobolka Washington heli karaan xannaano tayo wanaagsan.

- In La Helo xannaano tayo wanaagsan waxa ay aasaas u tahay qoysaska ka soo gudbaya kaalmada dowladdu siiso si ay u shaqeystaan, sida kuwa danyarta ah ama dakhligoodu meel-dhexaadka yahay ee dedaalka ugu jira sidii ay isku-filnaansho u gaari lahaayeen.

- Shaqaalaha xannaannada carruurta qoysaska waxay qeyb ka yihiin Nidaamka Xannaannada Carruurta, iyadoo lagu haqabtirayo waalidiinta shaqeysa oo gaaraya kumannaan si loogu xannaanneeyo carruurta kharashkooda lagu daboolo barnaamijyada kabista ah ee lagu faahfaahiyey Qoraalka Sharaxaadda B.

- Shaqaalaha, Gobolka iyo qoysaska Washington, dhammaan waxa ay ku hawlan yihiin in ay xannaannada carruurta ka dhigaan shaqo tayo wanaagsan oo meherad ahaan la ixtiraamo.

- Labada dhinac waxa ay isku raaceen in ay wada-jir ahaan u shaqeeyaan si ay u daboolaan baahida waalidiinta shaqeeya iyo in ay adeegyada noocan ah u qabtaan sida ugu wanaagsan.

- Gobolka, Ururka Shaqaalaha, iyo Shaqaalaha, intuba waxa ay isu xaq-dhowri doonaan si sharaf iyo xushmad leh.

Ma jirto arrin heshiiskan ku jirta oo loo qaadan karo in ay dhibaato u keeneyso xuquuqda Waalidka/Masuulka, oo haddii ay doonaan soo xulan kara, beddeli kara, ama shaqada ka eryi kara shaqaalaha carruurta u haya.

Ma jirto arrin gogoldhiggan ku jirta oo loo qaadan karo in ay tahay dacwad heshiiska lagu soo daray.

QODOBKA 1
AQOONSIGA URURKA SHAQAALAHA

1.1 Aqoonsiga Ururka Shaqaalaha

Ururka Shaqaalaha Caalamiga ah ee Xafiiska 925 waxaa loo aqoonsan yahay in uu yahay midka keliya iyo wakiilka aan muran ka taaganeyn ee sida ku qoran sharciga RCW 41.56, matali kara dhammaan shaqaalaha shatiga leh iyo kuwa aan shatiga lagu xirin ee xannaannada carruurta qoysaska.

1.2 Midnimada Kooxda Heshiiska

Gobolku waxa uu aqoonsan yahay midnimada kooxda heshiiska u xilsaaran, sidaas awgeed kooxdaas laguma sameyn karo wax waxyeello ah oo burburin ku noqon kara.

QODOBKA 2
MIDABTAKOOR LA'AAN

Gobolku waxa uu axdi ku galay in uusan wax midabtakoor ama leexin ah ku sameyn karin shaqaalaha iyada oo loo eegayo jinsiyad, lab ama dheddig kii uu yahay, lab ama dheddig kii uu guur ka damco, xaaladda xaas ahaaneed ama arrinta dhaqaalaha waalidka, asal ahaan meel laga soo jeedo, siyaasadda uu qof raaco iyo/ama caqiido uu qof aamminsan yahay, ama naafannimo xagga jirka ama maskaxda ah.

Qodobkan looma fasiran karo in uu hor istaagi karo xuquuqda waalidka/masuulka nagu xiran ama nala soo xiriiri doona. Waalidka/masuulku waxa ay xaq u leeyihiin in ay soo xulan karaan, shaqaaleyn karaan, isha ku hayn karaan shaqada loo hayo, iyo in ay shaqada ka eryi karaan cid kasta oo shaqaale u ah oo uga shaqeysa xannaannada carruurtooda.

QODOBKA 3
XUQUUQDA WAALIDKA/MASUULKA

3.1 Yaa Noqon Kara Waalid/Masuul

Iyada oo la tixgelinayo heshiiska iyo sharciga waddanka, waalid/masuul waxaa noqon kara shaqsiyaadka soo socda ee u xilsaaran go'aanka hal cunug (1) ama in ka badan oo ku nool gobolka Washington, oo weliba cunugga u ah:

A. Waalid, waalidka dhalay ama waalid soo korsaday;
B. Aayo ama adeerka hooyo qaba;
C. Masuul sharciyeysan oo waraaq sharci ah maxkamad ka haysta;
D. Walaal Dhali kara ama walaal ay aayo dhashay ama walaal uu adeer hooyo qaba dhalay
E. Qof weyn oo abti ama adeer loo yahay;
F. Eeddo;
G. Adeer;
H. Ayeeyo ama Awoowe; Ama
I. Qaraabo kale oo ayeeyo ama awoowe masuul ah noqon kara.

3.2 Xuquuqda Waalidka/Masuulka

Ma jirto arrin heshiisan ku jirta oo is-hortaagi karta xuquuqda aan la isku haysan ee Waalidka/Masuulka, taas oo sheegeysa in qofka shaqaalaha ah kolkii la doono—iyadoon wax sabab ama ogeysiis ah la haysan—shaqada laga joojin karo.

3.3 Macluumaadka Khuseeya Waalidka/Masuulka

Heshiiskan looma fasiran karo in Gobolka looga codsado xogta warbixinta shaqsiga ah ee ku saabsan Waalidka/Masuulka ama carruur waalid hayo; kolka uu waalidka/masuulka helayo dhaqaale dowladeed oo looga bixinayo xannaannada carruurta, Ururka Shaqaalaha si ay xogta ku helaan waxa ay u baahan yihiin caddeyn qoraal ah oo ay u soo sixiixaan waalid/masuul. Qaar ka mid ah warbixinta shaqsiga ah waxa ay noqon karaan: Magac, cinwaan, lambar taleefan, cinwaanka intarnetka (email), wax kale oo noqon kara lambar qof lagu garan karo, sida sagaalka lambar ee uu qof kasta leeyahay (Social Security Number) ama wax kasta oo noqon kara warbixin uu shaqsi leeyahay.

3.4 Sida Loo Xafidayo Xogta Waalidka/Masuulka

Wakiillada ururka shaqaalaha iyo shaqaalaha xannaannada carruurta waxa ay ku dhaqmi doonaan sharciyada adag ee lagu xafido xogta waalidka/masuulka iyo carruurta go'aankoodu qof weyn hayo ee helaya dhaqaale dowladeed oo looga bixiyo xannaannada carruurta, marna cid kale looma gudbin doono warbixinta shaqsiga ah ee ku lug leh waalidka/masuulka iyo carruurta uu go'aankoodu qof weyn hayo, taas waxaa ku jira warbixinta ka timaadda meel walba, inta aan warbixin la gudbin waa in kolka hore oggolaansho qoraal ah laga helaa waalidka/masuulka ama waa in uu jiraa sharci sandulle ku rabo warbixinta ama waa in ay jirtaa arrin kale oo sheegeysa in sharci ahaan loogu baahan yahay.

3.5 Xuquuqda Aan Marna La Is Duudsiin Karin

Arrimaha la soo xusay ee xuquuqda waalidka/masuulka kuma jiraan ama lagama saarin xuquuqda kale ee caadiga ah ee aan la soo sheegin, taas waxaa ka mid xuquuqda kale ee waalidnimo ee ku qoran sharciga waddanka. In la ogsoonaado ama in aan la ogsoonaan xuquuqda waalidnimo waxaa u madax bannaan waalidka/masuulka oo ugu dhaqmi kara sidii la doono oo ay haddii ay doonaan isaga wareejin karaan.

3.6 Waalidka/Masuulka Aan Cabasho Sameyn Karin

Ma jirto wax ay waalid/masuul fali karaan oo tixgelinaya Qodobkan ama wax kale oo ah xuquuqda waalidka/masuulka oo sameyn kara dawcad iyo nidaam gar-qaadasho ah oo ku saleysan Heshiiskan.

QODOBKA 4
XUQUUQDA URURKA SHAQAALAHA

4.1 Waxyaabaha Ka Baxsan Xeerxayndaabka Ururka Shaqaalaha

Gobolku lama kulmayo, lama faaloonayo, ma qiimeynayo, dhaqaale kuma kabayo ama lama xaajoonayo urur kale oo shaqaale ama wakiillo uu kala hadlo arrimaha khuseeya dhammaanba shuruudaha shaqaaleynta iyo baayactanka xubnaha kooxda heshiiska. Si kastaba ha ahaatee Ururka Shaqaalaha wuxuu aqoonsan yahay in uu Gobolku ka soo baxo sharciga waajibka ah ee hoos imaanaya RCW 43.215, kaasoo badanaaba ku lug yeelan kara wadahadalka ay ku baayactamaan xubnaha ama kooxaha iyagoo aan ogeysiineyn ama aan u baahneyn Ururka Shaqaalaha in uu u soo u xaadiro wqadahadalka.

4.2 Hawlaha Ururka Shaqaalaha

Gobolku waxa uu axdi ku galay in aan Shaqaalaha midabtakoor loogu sameyn iyada oo ay ugu wacan tahay in la isaga caga jugleeyo, in wax laga xannibo ama in wax aysan rabin lagu khasbo, oo kolkaasna loo xuskado xuquuqda sharciga ah ee ku xusan Heshiiskan, ama in loo soo maro sababo la xiriira xubin ka ahaansho iyo in aan xubin laga ahayn urur, ama in loo hoos galo hawlo sharci ah oo ku xiran Ururka Shaqaalaha.

4.3 Wakiillada Ururka Shaqaalaha

Ururka Shaqaalaha waxa uu Gobolka ogeysiin doonaa magacyada wakiillada xafiiskooda iyo abaabuleyaasha, iyo haddii ay wax is beddelaan wixii isbeddel ah ee lagu sameeyo wakiilladaas.

4.4 Dhexdhexaadnimo

Gobolku wuxuu dhexdhexaad ka ahaanayaa wixii su'aal ah ee khuseeya xubin-ka-noqoshada ururka shaqaalaha iyo wixii kale ee ururka shaqaalaha wakiil uga noqonaya Shaqaalahooda. Dhammaan su'aalaha Gobolka soo gaara ee khuseeya xubin-ka-noqoshada ama wakiill-ka-noqoshada arrimaha Ururka Shaqaalaha waxaa loo soo gudbinayaa Ururka Shaqaalaha.

4.5 Liiska Shaqaalaha

Bil walba maalinta shan-iyo-tobanaad (15^{-aad}) Gobolku waxa uu Ururka Shaqaalaha u soo gudbin doonaa liiska Shaqaalaha iyada oo loogu soo dirayo kambuyuutarkooda. Liisku waxa uu isugu jiri doonaa:

A. Hawlaha xannaannada ee bishii hore la qabtay;
B. Bishii hore magacyada Shaqaalaha la siiyey kabista dhaqaale oo dhan, taasoo ka soo baxday ku-baayactanka shaqada;
C. Lambarka qofka shaqaalaha ah;
D. Cinwaanka ay lacagta qaansheegadka ah ka timaaddo;
E. Cinwaanka qofka shaqaalaha ah;
F. Lambarka taleefanka;
G. Haddii uu qofka shaqaalaha ah leeyahay shati iyo haddii kale;
H. Lacagta mushaarka ah ee la bixiyey;
I. Inta carruur ee la hayey; Saacadaha shaqada (maalin nuskeed, hal maalin ama saacad)
J. Tirada carruurta la hayey;
K. Lacagta loo gooyo Ururka Shaqaalaha ama Lacagta Kale ee laga gooyey mushaarka Shaqaalaha; Iyo
L. Cinwaanka intarnetka ee Qofka Shaqaalaha ah (email), haddii uu jiro.

4.6 Wacyigelinta Ururka Shaqaalaha

Gobolku waxa uu Ururka Shaqaalaha ogeysiin doonaa iyada oo madaxbannaani loo siinayo, in uusan tababarka bilowga ah ee Shaqaalaha aan Shatiga Laga Rabin dhaafin soddon (30) daqiiqo. Haddii tababar la isku siiyo intarnetka, Gobolku wuxuu Ururka Shaqaalaha intarnetka ugu gudbinayaa cinwaanka lagala xiriiri karo shaqaalaha soo dhammeystay tababarka intarnetka ee bilowga ah. Warbixinta la iskula soo xiriirayo waxaa ku jira lambarka Qofka Shaqaalaha ah, magic, cinwaan, lambarka taleefanka, wakhtiga ugu wanaagsan ee la is heli karo, iyo haddii uu jiro cinwaanka intarnetka (email).

Gobolku waxa uu Ururka Shaqaalaha ogeysiin doonaa iyada oo madaxbannaani loo siinayo, in haddii uu jiro uusan tababarka wacyigelinta ama hawl ka soo horreysa tababarka Shaqaalaha Shatiga Leh dhaafin soddon (30) daqiiqo. Gobolku waxa uu Ururka Shaqaalaha ogeysiin doonaa isla marka la iska dhaafo ama la baddelo jadwalka wacyigelinta. Mowduucyada uu Ururka soo bandhigayo waxa ay ku egyihiin kuwa soo socda: Wacyigelinta, sida wakiil looga noqonayo Shaqaalaha, faa'iidooyinka ururka shaqaalaha iyo in la qeybiyo waraaqaha codsiga xubin-ka-noqoshada. Gobolku wuxuu dhexdhexaad ka ahaanayaa wixii khuseeya wakiillada Ururka Shaqaalaha.

Ururka Shaqaalaha waxa uu (go'aanka uu qaadanayo) Gobolka ku siin karaa hal (1) bog oo koobbi xayeysiis ah oo ay ku qoran tahay heshiiska guud ee Shaqaalaha iyo faa'iidooyinka uu Gobolku ku sheego waraaqaha wacyigelinta ah. Halkaas (1) bog wuxuu ahaan doonaa mid ay ku qoran tahay qoraal ay ka muuqato dhexdhexaadnimo kaas oo uu Gobolku aqoonsan doono ka hor inta aan la qeybin.

4.7 Ogeysiisyo Boorarka lagu Qoro

Ururka Shaqaalaha waxaa loo oggolaan doonaa in uu keeno oo uu weliba qoraal ku sameeyo boorarka ogeysiisyada ah ee la dhigayo Xafiiska Waaxda Waxbarashada Bilowga ah (marka laga saaro Xafiiska Gobolka) iyo Xafiiska La-xiriirka iyo Sii-gudbinta ee (R&R), halkaas oo boos lagu xiro looga helayo. Gobolu wuxuu xafiiska R&R ku wargelinayaa xuquuqda uu Ururka Shaqaaluhu u leeyahay in ay boorkooda meel u helaan.

Ururka Shaqaalaha waxa uu keeni doonaa boor yar oo ah (2' x 3') kaas oo meel la suri karo iyada oo uu ku sawiran yahay sawir gacmeed qurxoon sida dhul cagaaaran oo nabaad ka muuqdo. Boorarka si muuqata ayaa loogu qori doonaa in ay yihiin milkiyadda SEIU Xafiiska 925. Boorarka waxaa dayacrtiri doona hoggaanka iyo/ama dadka u shaqeeya Ururka Shaqaalaha. Ururku Shaqaalaha wuxuu axdi ku qaaday in ay waxyaabaha boorarka lagu qori doono noqon doonaan wax ku habboon goob shaqo, wax aan siyaasad shaqo ku lahayn, wax aan ka hor imaanayn sharciga gobolka iyo weliba wax si cad loogu qori doono qoraallada kale ee ururka shaqaalaha. Xiriirka SEIU laguma qori doono meelo kale oo ka mid ah goobaha hay'adda.

Labada dhinac waxay isku raacsan yihiin in SEIU iyo xafiiska R&R ay isla gorfeyn doonaan meelaha ku dhex yaalla dhismayaasha ee boorarka SEIU iyo haddii kale oo ay isku raaci waayaan meel ay go'aansadaan, Gobolka ayaa isku dayi doonaa inuu xal u helo xaaladda, xilkaasi wuxuu noqon doonaa mid ku habboon wakiil ay ku siiyaan kunturaad hoosaad.

Ururka shaqaalaha ayaa ah mid si gaar ah masuul uga ah wixii kharash iyo dayactir ah ee ay boorarku u baahdaan.

4.8 Ogeysiis

Gobolka ayaa Ururka Shaqaalaha u keeni doona koobi waraaqo ah ama mid kambuyuutar ah, kaas oo ay ku caddahay wax kasta oo uu gobolku ogeysiis ahaan ugu tala galo Shaqaalaha oo dhan.

4.9 Soo-saaridda Heshiishyada

Gobolku wuxuu bixin doona boqolkiiba konton (50%) ka mid ah kharashka lagu daabacayo heshiiskan ilaa iyo ugu badnaan shan-iyo-labaatan kun ($25,000) oo ku filnaan karta tirada loo qeybinayo xubnaha ka tirsan kooxda heshiiska.

QODOBKA 5
XUBIN KA NOQOSHADA IYO FAA'IIDOOYINKA URURKA SHAQAALAHA

5.1 Faa'iidooyinka Ururka Shaqaalaha

Qof kasta oo ka shaqeeya xannaannada carruurta ee uu Heshiiska khuseeyo ee lagu mushaaro dhaqaale kabis ah oo ka yimaada adeegyada xannaannada carruurta, muddo aan ka badneyn soddon (30) maalmood oo ah maalmaha la shaqeynayo oo laga soo bilaabo maalintii koowaad ee ay hawsha carruurtu bilaabatay, waa in uu qofkaas shaqaalaha ah ku biiraa Ururka Shaqaalaha oo ahaadaa xubin joogto ah oo Ururka ku bixiya lacagta la iska rabo, shuruudda lagu aqbalayo mushaarka kabista dhaqaalaha ah ee loogu tala galay hawsha xannaannada carruurta waxay ku sii soconeyso waa in xaq loo yeesho oo keliya oo hawshii xannaannadana laga soo baxo. Gobolka mushaarka ayuu bixin doonaa balse ma noqonayo cidda shaqada bixisa, haddaba si loo xoojiyo shuruudaha faa'iidada ururka shaqaalaha waa in la eegaa, oo dabadeedna iyada oo loo eegaayo sharciga RCW 41.56.113, waa in mushaarka laga gooyo lacagta kooxda heshiiska sida uu ururka shaqaaluhu ka doonayo xubnaha, ama, in kuwa aan Ururka Shaqaalaha xubnaha ka ahayn iyagana laga gooyo lacag u qalanta lacagta xubnaha laga gooyo. Qofka shaqaalaha ah ee ka soo bixi waaya waajibaadka laga rabo, waraaq qoraal ah ayey Ururka Shaqaaluhu ugu diri doonaan Gobolka, waxaa qofkaas loo soo diri doonaa ogeysiis looga joojinayo in lagu mushaaro shaqada ilaa laga arko in lagu qanco sida uu qofkaasi uga soo baxo waajibaadka laga rabo.

5.2 Inaan Urur Lagu Biirin oo Xaq Leeyahay

Heshiiskan waxaa saldhig u ah shuruudaha Qodobkan in ay shaqaaluhu u cuskan karaan xuquuqdooda ay ku diidi karaan in ay urur xubin ka noqdaan iyaga oo ku saleynaya *arrin ay soo xaqiiqsadeen* arrin la xiriirta diin ay ku dhaqmaan oo ka reebeysa in ay urur xubin ka noqdaan. Sida ku cad Qeybta 1-aad ee Qodobkan shaqaalaha caynkaas ah waxa ay bixin doonaan lacag u qalanta lacagta ururka loo gooyo, taas oo ah mid si isku mid ah looga qaado shaqaalaha kale, haddii ay isku raacaan qofka shaqaalaha ah iyo Ururka Shaqaalaha lacagtaas waxa loo goyn karaa urur kale oo sadaqo ahaan loo siiyo oo aan diin wax shaqo ah ku lahayn. Si loola socdo saddex biloodba mar ayuu qofka shaqaalaha ah mushaarkiisa u soo gudbin doonaa Ururka Shaqaalaha. Shaqaalaha ku andacoonaya in aysan doonayn in ay ka mid noqdaan urur shaqaale iyaga oo ku saleynaya *arrin ay soo xaqiiqsadeen* arrin la xiriirta diin ay ku dhaqmaan oo ka reebeysa in ay urur xubin ka noqdaan, haddaba shaqaalahaasi waa in ay Ururka Shaqaalaha u keenaan ogeysiis qoraal ah oo arrintaas ku saabsan, weliba isla markaas waa in Ururka Shaqaalaha loo keenaa magac(yo) iyo cinwaanka hal (1) ama in ka badan ah oo ah hay'adaha sadaqada, hay'adahaas waa in ahaadaan kuwa ay shaqaaluhu doonayaan in ay ku bixiyaan lacagtii ay sidii laga rabay shuruud ahaan ku bixin lahaayeen ururka shaqaalaha. Lixdan (60) maalmood gudahood ka dib kolka la helo ogeysiis qoraal ah oo ah xuquuq lagu raadinayo in ururka laga hoos baxo, Urur Shaqaalaha wuxuu qofka shaqaalaha ah siin doonaa jawaab qoraal ah oo loogu hawlgalayo booskii uu Ururka Shaqaalaha ka joogi lahaa labada dhinac:

A. In uu qofka shaqaalaha ah xaq u leeyahay in uu lacagtiisa meel kale ku bixiyo; Iyo

B. In uu Ururka Shaqaalaha aqbalo ama in uu diido hay'adda ama hay'adaha sadaqada ee uu qofka shaqaalaha ah soo doortay.

C. Wixii khilaaf ah ee ku saabsan sida uu qofka shaqaalaha ah xaq ugu yeelan karo in uu lacagtiisa meel kale ku bixiyo iyo/ama in ay Ururka Shaqaalaha iyo qofka shaqaalaha ah isku raaci waayaan sida ay lacagta ka yeeli doonaan, arrintaas si go'aan kama dambays ah looga qaato waxaa la isula tegi doonaa Guddiga Dowladda ee Xiriirka Shaqada (PERC).

5.3 Dhibaato La'aan Iyo Waxyeello La'aan

Ururka Shaqaalaha iyo qof kasta oo shaqaale ah oo oggolaanaya in lacagta lagu bixiyo tan ururka loo gooyo ayaa waxa ay tahay in ay isku waafaqaan in lacagtaas sideeda loo hayo si loogu daboolo wixii ah cabasho, baahi, dacwad ama magdhawyada kale ee soo ifbixi kara ee gobolka loogu qabsan karo arrimaha la xiriira lacagta laga gooyo qofka shaqaale ah. Hadalka caynkaas ah looma fasiran karo in uu yahay mid lid ku ah xuquuqdii uu Ururka Shaqaaluhu u lahaa in uu u isticmaalo Dariiqii Xalinta Khilaafaadka, kaas oo sida heshiiska ku cad sheegaya in la iska qaado wixii lacag ah ee noqon kara khidmad ama mid si kale loo ururiyo.

QODOBKA 6
KHARASHKA URURKA LA ISAGA GOOYO, LACAGTA XAFIISKA, IYO LACAGTA SHAQAALAHA LAGU SOO BIIRIYO

6.1 Kharashka Ururka

Gobolku wuxuu mushaarka Qof kasta oo ah shaqaale ah ka goyn doonaa lacagta ururka, lacagta kale ee PAC, Guddiga Waxqabadka Siyaasadda iyo lacagta shaqaalaha looga gooyo caymiska caafimaadka sida ay Ururku Shaqaaluhu go'aamiyeen oo ay Shaqaaluhuna ku raaceen. Lacagta uu Ururka Shaqaaluhu kugu leeyahay ee bil walba waxa loo diri doonaa inta aan la gaarin 15^{ka} bisha. Ururka Shaqaalaha waxa uu masuul ka yahay in uu shaqaalaha u soo celiyo kuwooda bixiya lacag ka badan intii ay bixin lahaayeen (taasoo ay qeexeen Ururka Shaqaalahaoo ay Gobolku fuliyeen) si loo xoojiyo shurrudaha kale ee sharciga ah ee la xiriira sida lacagta loo ururinayo.

6.2 Waraaqaha Caddeymaha ah ee Shaqaalaha

Bil walba lacagta biilka ah ee la soo dirayo waxay isugu jiri doonaan kharashka ururka shaqaalaha, lacagta xafiiska, lacagta dowladdu shaqaalaha ku biiriso ee PAC, iyo lacagta caymiska caafimaadka shaqaalaha ee bishaas la iska rabo.

Laga bilaabo Jannaayo 31^{deeda} sannad walba, Gobolka wuxuu waraaqaha hay'adda canshuurta foomka 1099 iyo W-2 ku darayaa lacagta ururka, lacagta kharashka xafiiska, lacagaha PAC iyo lacagaha loo gooyo caymiska caafimaadka ee loo dhiibo Ururka Shaqaalaha iyo/ama hay'adda Ammaanka Trust ee Gobolka, taasoo ku hadleysa magaca Shaqaalaha Carruurta haya, lacagahaas oo dhan waxaa loo xisaabinayaa dakhliga (dakhliga guud) ee ay tahay in la sheego.

6.3 Lacagta iyo Sida Wax Loogu Fulin doono

Gobolka ayaa ka masuul ah isbeddelka kharashka barnaamijka SSPS ee uu Qodobkan dhigayo wixii ka dambeeya kharashka bilowga ah ee ay kol hore Ururka Shaqaaluhu bixiyeen. Lacagta joogtada ah ee la iska gooyo, lacagaha xafiiska, lacagta PAC (Guddiga Waxqabadka Siyaasadda) iyo caymiska caafimaadka ee qofka shaqaalaha ah, dhammaan waxaa masuul ka ah Gobolka.

QODOBKA 7
NIDAAMKA DACWADA

Sida Loo Xallinayo Khilaafaadka

Gobolka iyo Ururka Shaqaalaha waxaa ka go'an in ay isu sheegtaan oo ay xalliyaan dareenka jira iyaga oo si hooshoos ah wax u wada oo muujinaya caddaalad iyo dhaqan ay masuuliyad ka muuqato, iyo in la isticmaalo dhexdhexaadin iyo haddii ay suuroobeyso in la isticmaalo farsamo lagu xalliyo khilaafaadka. Xiriirkeennu waxa uu ku xiran yahay in aannu is xushmeyno iyo in aannu is aamminno iyada oo aan xal u raadineyno wax kasta oo aannu isku raaci weyno. Inta aan cabasho la buuxin ka hor, Ururka Shaqaalaha iyo Gobolku waxa ay isku dayi doonaan in ay haddii ay suuragelyso xal u helaan wax kasta si markaas la isaga daayo dacwada rasmiga ah ee qoraalka ah.

7.1 Qeexid

A. Qeexidda Cabashada

Kolka ay cabasho jirto macnaheedu waa in uu jiraa khilaaf ka yimid sidii hawl loo fulin lahaa iyada oo loo eegaayo shuruudaha Heshiiska ku cad sida ay soo gudbiyeen Ururka Shaqaalaha ama qof Shaqaale ah. Ururka Shaqaalaha iyo qofka Shaqaalaha ah midna lama imaan karo cabasho aan sharci ahayn oo ka baxsan xeerxayndaabka Heshiiska, waxaa ka mid ah in uu Waalid/Masuul qof Shaqaale ah keensado ama in uu qof shaqeynaya shaqada ka joojiyo, ama wixii tallaabo kale ah oo uu Waalidka/Msuulka ku kaco.

B. Xisaabinta Wakhtiga/Saacadaha

Wakhtiga la xaddiday ee ku jira Qodobkan waa in si adag loogu dhaqmo ilaa ay labada dhinac qoraal ku beddelaan. Maalmaha lagu xisaabtamayo waa maalmaha shaqada oo laga saarayo maalinta ugu horreysa laakiin lagu xisaabinayo maalinta jadwalka bishaas ugu dambeysa. Marka ay maalinta u dambeysa noqoto maalin Sabti ah, ama axad ah, ama maalin ciid ah, markaas maalintii u dambeysay waxaa noqon doona maalinta xigta ee aan ahayn sabti, axad, ama maalin ciid ah. Soo-gudbinta cabashooyinka, racfaanka iyo jawaabaha waxay noqon doonaan qoraal iyo kuwa aan soo dibdhicin oo taariikhda ayaa loo eegayaa, ama waxaa loo eegayaa shaabadda boostada markay ku dhacday.

C. Ciddii ku Imaan Weyda Wakhtiga la Isku Ogyahay

Ciddii ku xadgudubta wakhtiyada ay isku ogyihiin Ururka Shaqaalaha waxa si toos ah looga reebayaa cabashada. Ciddii ku xadgudubta wakhtiyada ay isku ogyihiin Gobolka waxaa loo gudbin doonaa Ururka Shaqaalaha oo cabashadoodu waxay ka bilaabaneysaa tallaabada ku soo xigta ee nidaamka cabashada.

D. Tusmada

Cabashada qoraalka ah waa in ay ku jiaan macluumaadka soo socda:

1. Qoraal ku lug leh xaqiiqooyinka ku xeeran arrimaha dabiiciga ah ee cabashada;
2. Taariikhda ama wakhtiga ay arrintu dhacday;
3. Kolka la buriyo qodob gaar ah ama qeyb Heshiiska ka mid ah;
4. Tallaabooyinka la qaaday iyada oo aan rasmi ahayn si loogu xalliyo cabashada iyo dadka ku lug leh xalka la isku dayey;
5. Xalka gaarka ah ee la codsaday;
6. Magaca qofka cabashada wata;
7. Lambarka qofka shaqaalaha ah ee cabashada qaba; Iyo

8. Magaca iyo sixiixa wakiilka Ururka Shaqaalaha ama Qofka Shaqaalaha ah ee xareynaya cabashada.

E. Isbeddellada
Ma la sameyn karo wax dacwad cusub ah oo ka timaadda khaladaad iyo/ama xal la gaaray ka dib marka la xareeyo cabashada qoraalka ah ee bilowga ah, waxa kaliya oo dacwaddaas la aqbali karaa marka ay labada dhinac wadajir ahaan u sameeyaan heshiis qoraal ah.

F. Xallinta
Haddii uu Gobolku bixiyo wixii xal ah oo laga dalbaday ama wixii ay labada dhinac wadajir ahaan isugu raaceen, cabashada waxaa loo tixgelin doonaa mid la isla meel dhigay oo tallaabo kale uma sii gudbi doonto.

G. Kanoqoshada Arrin Laga Noqdo
Wixii cabasho ah waxaa laga noqon karaa markii la rabo.

H. Dib-ka-keenis
Haddii wax la xalliyo, ama laga noqdo. ama jadwalku socon waayo, wax cabasho ah kol labaad lama soo diri karo.

7.2 Nidaamka Dacwada

A. <u>Cabashada Hadalka ah</u>
Tallaabada 1-aad 1: Si xal loogu helo wixii cabasho ah ee jira, qofka Shaqaalaha ah iyo/ama wakiil ka socda Ururka Shaqaalaha ayaa waxa ay ku khasban yihiin in ay arrinta jirta u soo bandhigaan wakiil ka socda dhinaca Gobolka ka hor inta aan la sameyn cabasho qoraal ah ama aan lala xiriirin taleefanka lacag la'aanta lagu garaaco ee 1-888-270-0613.

Gobolku waxa uu u baahan yahay soddon (30) maalmood oo ay xal ugu raadiyaan mushkiladda taagan, ama, haddii aysan xal heli karin jawaab qoraal ah ayey u soo gudbin doonaan qofka Shaqaalaha ah iyo/ama Ururka Shaqaalaha. Wakiil ka socda dhinaca Gobolka ayaa Ururka Shaqaalaha bil walba u soo gudbin doona warbixin ay ku jirto inta jeer ee la soo garaacay taleefanka khadka cabasahda iyo sidoo kale inta jeer ee la xalliyey taleefannadaas iyo inta aan la xallin.

B. <u>Cabashada Qoraalka ah</u>
Tallaabada 2-aad : Haddii aan cabashada lagu xallin Tallaabada 1-aad, Qofka Shaqaalaha ah iyo/ama wakiillada Ururka Shaqaalaha waxay cabasho qoraal ah u soo diri karaan Maamulaha Heshiiska Guud oo laga heli karo Waaxda Waxbarashada Bilowga ah (DEL), balse waa in ay noqotaa muddo ku siman shan-iyo-toban (15) maalmood ka dib kolka ay timaaddo jawaabta Tallaabada 1-aad ee Wakiilka Gobolka. Haddii uu Qofka Shaqaalaha ah isku dayo in uu arrin mushaar ku xalliyo nidaam cabasho oo afka ah, Qofka Shaqaalaha ah wuxuu haysan doonaa shan-iyo-toban (15) maalmood oo uu ugu gudbi karo Tallaabda 2-aad ee cabashada ka dib kolka uu helo mushaarkii ka maqnaa balse uu weli dacwad ka qabo mushaarka. Wixii khalad ee ka soo baxa mushaarka, waqtiga dacwada wuxuu ku cad yahay Qodobka 10-aad Qeybtiisa 4-aad.

Haddii ay dhacdo khilaafaad ka yimaada mushaar la'aan awgeed, cabsahooyinka waa in lagu soo xareeyo muddo ku siman soddon (30) maalmood gudahood marka laga soo bilaabo kolka ay khaladku bilowdeen ama waa in lagu soo xareeyo kolka ay Qofka Shaqaalaha ah ama Ururka Shaqaaluhu si macquul ah u garowsadaan in arrinta noocaas cabashada lagu biirin karo.

Cabashada qoraalka ah waxay noqon kartaa mid toos xafiiska loo keeno, mid boostada lagu soo diro, mid lagu soo diro fakis ahaan ama mid lagu soo diro cinwaanka intarnetka (email).

Gobolka ayaa cabashada jadwal u sameyn doona oo taleefan ama si faal-ka-fool ah ula xiriiri doona qofka wax eedeynaya iyo wakiilka Ururka Shaqaalaha muddo ku siman shan-iyo-toban (15) maalmood marka ay ka soo wareegato kolkii la helay cabashada qoraalka ah, dabadeedna waxaa xigi doonta in la wada hadlo oo xal loo helo cabashada. Kulankaas wixii ka dambeeya haddii aan wax xal ah la helin, laga bilaabo maalinta taleefanka lagu wada xiriiray Gobolka ayaa muddo ku siman labaatan (20) maalmood gudahood jawaab qoraal ah ka bixinaya cabashadaas.

C. <u>OFM/Xafiiska Xiriirka Shaqaalaha</u>

Tallaabada 1-aad 3: Haddii aan cabashada lagu xallin Tallaabada 2-aad laba usbuuc (14) gudahood inta lagu gudajiro diidmada Tallaabada 2-aad ama taariikhda kama dambeysta ah ee jawaabta la sugayey, qofka shaqaalaha ah iyo/ama ururka shaqaalaha ayaa cabashada horay ugu sii gudbin kara Xafiiska OFM ee Xiriirka Shaqaalaha, Labor Relations Office (OFM/LRO). Xaffiska Xiriirka Shaqaalaha (LRO) iyo Ururka Shaqaalaha ayaa go'aan ka gaari doona haddii ay shir qaban doonaan, haddii ay taleefan iskula hadli ay doonaan ama dhexdhexaadin. Xafiiska Xiriirka Shaqaalaha iyo wakiil ka socda DEL ayaa jadwal u sameysan doona waxa ay qaban doonaan kulan ama in taleefan lagula hadlo qofka dacwada qaba iyo wakiilka ururka shaqaalaha muddo ku siman soddon (30) maalmood gudahood ka dib kolka ay helaan cabashada qoraalka ah, dabadeedna waxaa xigi doona in la wada hadlo oo isku dayo in xal loo helo cabashadaas. Dhammaan kulanka ama taleefanka si wadajir ah loogu wada hadlo, Gobolka ayaa ku bixin doona jawaab afka la iska siiyo oo ku aaddan wixii cabasho ah.

Labda dhinac waxay oggolaan karaan in ay wakhtiga dheereystaan oo ay isku dayaan sidii ay dhexdhexaadin uga heli lahaayeen Guddiga Dowladda ee Xiriirka Shaqaalaha (PERC) ama adeeg kale. Haddii ay Gobolka iyo Ururka Shaqaaluhu si wadajir ahaan ah isugu raacaan in ay shir ama iyagoo taleefan ku xiriiraya heshiis oggolaadan, Ururka Shaqaalaha wuxuu soo gudbin karaa codsi heshiis oo ay PERC sameyso marka loo eegaayo sharciga WAC 391-55-020, inta lagu gudajiro shan-iyo-toban (15) maalmood gudahood oo ah heshiiskaas waa in koobbi loo soo diro OFM/LRO iyo Maamulaha Heshiiska Guud.

Haddii ay labada dhinac xal gaari waayaan, Ururuka Shaqaalaha ayaa qoraal ahaan muddo ku siman shan-iyo-toban (15) maalmood ku codsan kara shirka Tallaabada 3-aad, in taleefan lagu wada hadlo ama dhexdhexaadin si cabashada loogu gudbiyo qof garta goyn kara oo madaxbannaan.

D. <u>Garta Sida Loo Goynayo</u>

Tallaabada 1-aad 4: Haddii aan cabashada lagu xallin Tallaabada 3-aad Ururka Shaqaalaha wuxuu soo codsan karaa codsi dhexdhexaadin ah. Baahida loo qabo dhexdhexaadin iyo codsiga toddoba (7) qofood ee garta gooya waa in loo diro Ururka Dadka Garta Gooya ee Mareykanka (AAA) shan-iyo-toban maalmood gudahood inta lagu jiro shirka Tallaabada 3-aad, taleefanka lagu wada xiriiro ama xilli heshiis.
Labada dhinac waxa ay xulan karaan ciddii gartooda u goyn lahayd iyada oo laga doonayo in ay xarriiq dul mariyaan magacyada liiska toddobada (7) qofood ee garta gooya. Qori-tuur ama xarash-iyo-madax ayaa lagu go'aamin doonaa dhinaca doorashada ku horayn doona.

Qofka garta goynayo wax awood ah uma yeelan doono in uu ku daro, ka jaro, ama ka beddelo wixii shuruudo ah ee ku xusan Heshiisan. Qofka garta goyn doona wuxuu go'aankiisa ku ekayn doonaa arrinta ama arrimaha cabashada ilaa ay laba dhinac isku raacaan in ay wax baddelaan ama aysan sameyn wax qirasho ah oo keenaya cabasho magdhawgeedu ka weyn yahay wixii la go'aamin lahaa haddii aan la jebin Heshiiskan.

Qofka garta goynayo dhinacii uu xaal u garto ayaa raalli lagu wada ahaan doona oo labada dhinacba khasab ayey ku noqoneysaa. Labada dhinac waxa uu dhinac kasta bixin doonaa lacagta garta lagu goynayo barkeed(1/2), taas waxaa ku jirta lacagta garta lagu goynayo iyo qoraalka garta laga sameynayo. Haddaba dhinac walba waxa uu masuul ka yahay wixii kharash ah ee danahooda uga baxa, Qareen iyo markhaatiyaal. Haddii ay dhacdo in dib loo dhigo ama laga takhaluso dacwad dhexdhexaadin iyadoo ay ugu wacan tahay mid ka mid ah labada dhinac ee is haya, dhinicii maqan ayaa dusha laga saarayaa wixii kharash ah ee ka soo baxa dib u dhigista ama ka takhalusidda. Labada dhinac si isle'eg ayey u wada qeybsan doonaan kharashka ka yimaada dib-u-dhigista ama ka takhalusidda wixii wadjir ahaan loogu heshiiyey.

7.3 Mushaarka Caadiga ah iyo Mushaarka Dheeraadka ah

Wixii khilaaf ah ee la xiriira arrimaha mushaarka (ee aan ka ahayn mushaarka khaldan ee dheeraadka ah) waa in ay soo maraan nidaamka cabashada. Khilaafaadka khuseeya mushaarka khaldan ee dheeraadka ah waa kan keliya ee lagu xalliyo Nidaam Dhageysi oo Caddaalad ah.

7.4 Shati-u-helidda iyo Arrimaha Sharciyada

Arrimaha khuseeya shatiga shaqaalaha (kuwaas oo ay ku jirto diidmo, sidii la iska filayey, in muddo yar la iska qaado, and in si toos ah la iskala noqdo shatiga) wax shaqo ah kuma laha nidaamka cabashada.

Arrimaha ku lug leh awoodda uu Gobolku ku fulin karo WAC ee la xiriirta sida xaq loogu yeesho shaqaalaha xannaannada carruurta ee aan shatiga laga rabin (kuwaasoo ay ku jiraan laakiin aan ku ekayn xadka xannaannada, markhaatikaca qofka shaqaalaha ah, in la soo baarto qofka taariikhdiisii hore iyo habsankii shaqada ee qofkaas), waxaasoo dhan waxa ay ku lug leeyihiin nidaamka cabashada.

QODOBKA 8
SHIRARKA GUDDIGA SHAQAALAHA/MAAMULKA

8.1 Guddiga Maamulka Shaqaalaha

Si ay qasdi ahaan shaqaalaha iyo maamulkoodu u yeeshaan xiriir joogto ah iyo si ay wadajir ahaan uga faalloodaan arrimaha khuseeya danaha labada dhinac, wakiillada Gobolka ayaa la kulmi doona markii ay lagama maarmaan noqoto, laakiin waxay noqoneysaa wax aan ka yareyn lixdii biloodba mar, iyadoo ay joogaan wakiillada Ururka Shaqaalaha.. Labada dhinac waxa ay is-weydaarsan doonaan ajendeyaashooda hal (1) usbuuc ka hor inta aan la sameyn jadwalka lagu kulmayo. Kulammada ka hor waxaa la sameyn doonaa ogeysiis ugu yaraan laba (2) usbuuc ka hor.

QODOBKA 9
SHURUUDAHA LA ISKA RABO

9.1 Dakhliga oo La Soo Caddeeyo

Kolka uu jiro codsi la tixgelinayo oo ka yimaada qof Shaqaale ah ama qof kale oo saddexaad oo oggolaansho qoraal ah ka haysta qofka Shaqaalaha ah, Gobolku wuxuu bixin karaa caddeyn qoraal ah oo ku saabsan mushaarkii horay loo siiyey qofka Shaqaalaha ah iyo sida uu ula baayactamo Qofka Shaqaalaha ah.

9.2 Lama Oggola Shaqo-joojin Iyo In Shaqada Irridaha Loo Laabo

Inta la guda jiro heshiiskan, Ururka Shaqaalaha, Shaqaalaha carruurta haya iyo/ama wakiilladooda, midkoodna si toos ah ama si dadban uma sameyn karo wax carqalad ku noqda hawsha loo hayo carruurta; waxyaabahaas waxaa ka mid ah wax aan lagu ogeyn, sida in wax la isaga dhiirrado, cunaqabateyn ama taageerid shaqo-joojin, shaqo la isaga baxo, shaqo la gaabiyo, xanuun aan la ogeyn in la sheegto, iyo waxyaabaha kale ee kuwaas la mid ah.

Ururka Shaqaalaha, Shaqaalaha carruurta haya iyo wakiillada kale, dhammaantood oo laga filayo in ay ku dhaqmaan Heshiiskan, ma sameyn karaan in ay mudaaharaad awgiis u hor fariistaan mid ka mid ah waaxyada maamulka dowladda hoose ee Gobolka Washington, Gobolka Washington, iyo goobaha kale ee xafiisyada iyo wakiillada gobolka. Haddii uu Gobolku rumeysan yahay in ay jirto ama dhacayso hawl uu mamnuucayo qodobkan, wakiillada Gobolka waxa ay la xiriiri doonaan Guddoomiyaha Ururka ka hor inta aan shaqaalaha lagu sameyn wax tallaabo sharci ah si Ururka Shaqaalaha fursad loogu siiyo in ay xubnahooda ku wargeliyaan shuruudaha kunturaadda iyo sharciga.

Iyada oo la aqoonsan yahay xuquuqda uu Waalidka/Masuulku ku xulan karo, ku shaqaaleyn karo, ama uu sabab awgeed iyo sabab la'aan shaqada uga joojin karo Qofka Shaqaalaha ah ee carruurta haya, ayey labada dhinac ee heshiiska waxa ay isku raaceen in uusan Gobolku wax awood ah u lahayn in uu irridaha u laabo Ururka Shaqaalaha ama shaqaalaha carruurta haya.

9.3 Dukumiintiga Qofka Shaqaalaha ah:

Qofka Shaqaalaha ah ee carruurta haya wuxuu u kuurgali karaa waraaqaha shaqada ee uu leeyahay ee ay Gobolku gacanta ku hayaan. Haddii waraaqaha shaqada la eegayo kolka lagu guda jiro saacadaha shaqada, waxaa waajib ah in ay joogaan wakiillo ka socda Gobolka haddii aysan iyagu ka tala bixin. Haddii ay Ururka Shaqaalaha doonayaan in ay arkaan qof Shaqaale ah waraaqihiisa shaqada, waxaa laga rabaa in ay haystaan oggolaansho qoraal ah ka hor inta aysan dalban. Qofka Shaqaalaha iyo/ama Ururka Shaqaalaha midna ma baddeli karo waxyaabaha ku qoran waraaqaha shaqada; haddaba Qofka Shaqaalaha Carruurta ah wuxuu keeni karaa diidmada oo qoraal ah oo ay la socoto waraaqaha dacwada lagu tixgelinayo. Qofka shaqaalaha ah wuxuu koobbi ama nuqul ka codsan karaa waraaqaha dukumiintiga ah, waxaa loogu soo diri doonaa muddo ku siman

afartan-iyo-shan maalmood (45) oo ah maalmaha la shaqeeyo, laakiin taas waxaa ka baxsan arrimaha la soo gudbiyo ee aan weli go'aan laga gaarin iyo wixii cabasho ah ee aan la xallin. Gobolku wuxuu ku dallaci karaa lacag macquul ah oo lagu sameeyo koobbiga waraaqaha ay soo codsadaan Shaqaalaha ama Ururka Shaqaalaha. Haddii uu Qof Shaqaale ah su'aalo ka qabo warbixin la oggolaaday, waxa la rabaa in uu qofkaasi soo gudbiyo racfaan arji qoraal ah oo ay DEL haddii ay muhiim tahay dib u eegto si ay ugu sameyso sharraxaad iyo sixid.

9.4 Waraaqaha oo La Turjumo iyo in Turjubaan La Diyaarsho

Gobolku wuxuu sida hadda uu sameeyo sii wadi doonaa in qoraallada waraaqaha lagu soo saaro afafka Isbaanishka iyo Ingiriiska. Gobolku wuxuu haddii loo baahdo ama la codsado sii wadi doonaa in uu turjubaanno isticmaalo kolka lala xiriirayo Shaqaalaha xannaannada carruurta.

9.5 Xuquuqda Shaqaalaha

Gobolku wuxuu aqoonsan yahay xuquuqda shaqaalaha si ay u soo helaan meel ay ku hayaan carruurta, si ay u joojin karaan shaqada ay u hayaan Waalidka/Masuulka, iyo si ay xiriir hoosaad u gaar ah ula yeeshaan Waalidka/Masuulka; xiriirkaas waa in uusan ka hor imaan karin sharciga dowladda dhexe, kan gobolka, sharciyada Waaxda Waxbarashada Bilowga ah iyo sharciyada kale ee u deggan barnaamijyada dhaqaalaha lagu kabo ee dowladda dhexe ama gobolka.

QODOBKA 10
MUSHAAR-BIXINTA

10.1 Mushaarka oo Aan Soo Daahin

Gobolku wuxuu xaqiijin doonaa in uu qofka Shaqaalaha ah helo mushaarka saxda oo caadi ah oo loogu soo diro iyada oo aan laga daahin. Haddii uu Qof Shaqaale ah doorbido nidaamka Qaansheegadka Degdegga ah, mushaarka waa in la bixiyo oo uu si toos ah koonto ugu dhaco ama waa in lagu soo diro cinwaanka boostada bisha cusub maalinta shaqada ugu horreysa ama marka la soo diro warqadda qaansheegedka, hadba sidii soo hormarta. Haddii ay warqadda qaansheegadka wax ka khaldan yihiin oo la arko in uu mushaarku kala dhiman yahay, Qofka Shaqaalaha ah waa inuu marka hore soo gudbiyo warqaddii qaansheegadka oo dhan si mushaarka loo siiyo, dabadeedna waa inuu Ogeysiiska Adeegga Bulshada u soo gudbiyo wixii uu ka saxay. Waxyaabaha khaldan waxaa lagu sixi doonaa qaansheegadka Dheeraadka ah ama qaansheegadka Caadiga ah hadba kii soo hormara.

10.2 Mushaarka oo Lagu Saleeyo Shaqadii La Qabtay

Mushaarka waxaa loo bixinaya sida soo socota:

1. Marka Waalid/Masuul loo oggolaado in uu xaq u leeyahay in carruurta loo hayo oo weliba loo soo diro waraaq caaddeyn ah ama marka Qofka Shaqaalaha ah qoraal lagu ogeysiiyo; Iyo

2. Marka qof Shaqaale ah oo Shati haysta loo shaqaaleeyo in uu carruur hayo; Ama

3. Marka qof Shaqaale ah oo aan Shati Laga Rabin uu soo buuxiyo shuruudaha soo socda oo dhan:

    a. in uu qofkaasi soo buuxiyo qeybta Part 2 ee waraaqda codsiga shaqada;

b. Waxaa loo go'aamiyey inaan qofna loogu diidin xaalado uu horay ugu soo maray;

c. waxaa loo doortay in xannaano la siiyo; Iyo

4. Marka uu Qofka Saqaalaha ah xaqiiqa ahaantii bilaabo xannaannada carruurta, inta lagu gudajiro maalmaha la soo oggolaanayo waxay ku jiri doonaan waraaqda oggolaanshaha.

Haddii ay dhacdo in la soo xaqiijiyo in waalidka Shaqo Lagu Meeleeyo, Dadka Shaqaalaha ah waxa ay la soo xiriiri karaan Taleefanka Macluumaadka ee Barnaamijka Shaqo Meeleynta (WCIP) oo uu lambarkiisu yahay midka lacag la'aanta lagu soo garaaco ee 1-866-218-3244

10.3 Shaqaalaha oo La Ogeysiisyo Kolka ay Shaqadu Ka Dhammaato

Gobolku wuxuu shaqaalaha iyo Waalidka/Masuulka isku mar ogeysiin doonaa marka la joojiyo dhaqaalihii xannaannada ee lagu kabayey carruurta la hayo iyo Waalidka/Masuulka. Haddii qof Shaqaale ah loo soo diro ogeysiis looga joojinayo shaqada, qofkaas waxaa la siin doonaa mushaarkii shaqada ee uu horay u qabtay oo dhan. Waalidka/masuulka shaqo Lagu Meeleeyo iyo Qofka Shaqaalaha ah waxaa la siin doonaa ogeysiis shaqojoojin ah ka hor toban (10) maalmood oo ka mid ah maalmaha shaqada.

Waalidiinta Shaqo Lagu Meeleynayo ee hela Xannaannada Carruurta ee caadiga ah iyo Xannaannada Carruurta ee ku eg Xilli go'an, kolka ay dhammaanayaan oggolaanshaha shan (5) usbuuc ka hor ayaa waraaq la soo diri doonaa.

10.4 Kolka Mushaarku Khalad Galo

Shaqaaluhu waa in ay Gobolka u soo gudbiyaan wixii mushaar ah oo ay ku weydiisanayaan adeegyadii xannaannada ahaa ee ay sameeyeen inta aan la dhaafin laba-iyo-toban (12) bilood ka dib kolkii ay shaqada qabteen.

Iyada oo la doonayo in la saxo wixii khalad ee xagga mushaarka ah (kolka waqtigii la rabay lagu soo gudbiyo wixii la isku leeyahay), waqtiga kama dambeysta ah ee dhinac walba laga rabo in lagu saxo wixii khalad mushaar ah oo dhacay waxa uu noqon doonaa sida soo socota:

1. Laba (2) sano haddii uu khaladku ka yimaado dhinaca sicirka mushaarka ah ee da'da iyo/ama meesha degaanka ah; Iyo

2. Ilaa iyo saddex (3) sano haddii khaladku ka yimaado meelo kale. Gobolka iyo qofka Shaqaalaha ah waxa ay tixgelin siinayaan caddadka lagu leeyahay iyo waxyaabaha kale ee soo ifbixi kara haddii la rabo in mushaarka la bixiyo. Gobolku uma raacanayo qofka Shaqaalaha ah wixii mushaar dheeraad ah oo waqti kasta ku qaata kolka mushaarka si khalad ah lagu bixiyo oo uu khaladkuna ka socdo dhinaca waalidka.

   Labada (2)sano ee ah waqtiga la isu qabtay ma khuseyso baarista xisaabaadka ah ee ay dowladda dhexe sameyso, baarista noocan ah ee dowladda waxa ay dib ugu noqon kartaa saddex (3) sano.

Wixii khalad ee ka yimaada qof mushaar lagu yareeyey waa in cabasho laga keenaa. Wixii khalad ah oo ka yimaada qof mushaar dheeraad ah la siiyey wax cabasho ah lagama keeni karo, laakiin waxaa lagu sameyn doonaa baaris dhageysi oo caddaalad ah.

10.5 In uu Mushaarku Si Toos ah Koonto Ugu Dhaco

Shaqaalaha waxaa loo bandhigi doonaa fursad ah in ay mushaarka ku heli karaan in si toos ah loogu diro koonto bangi oo ay iyagu leeyihiin.

10.6 Isbeddalada Oggolaanshaha iyo Codsiyada Labaad

Qofka Shaqaalaha ah waxaa cinwaanka intarnetka (email) koobbi ahaan, ama fakis lagu siin doonaa xaqiijinta xannaannada oo qoraal ah ama in uu sameeyo xannaano ka hor inta aysan bilaaban xannaannada.

Marka loo baahdo codsi kol labaad la keeno, Waalidka/Masuulku waa in uu soo gudbiyo codsiga labaad ee dhaqaale kabista ah oo buuxa oo wuxuu u baahnaan doonaa oggolaansho ka hor inta uusan dhammaan oggolaansha uu hadda haysto. Haddii xannaannada kol dambe la oggolaado qofka shaqaalaha ah waxaa mushaarka looga soo bilaabayaa markii ay xannaannadu bilaabatay, xitaa haddii ay dhacday wakhti u dhaxeeyey oggolaanshaha. Haddii aan xannaannada la oggolaan Gobolku ma bixinayo wax mushaar ah oo la siinayo qofka shaqaalaha ah ee carruurta hayey ilaa uu Waalidka/Masuulku soo diro waraaqaha muhiimka ah.

Qofka Shaqaalaha ah wuxuu Waalidka/Masuulka ka heli karaa in warbixin looga gudbiyo Gobolka si uu xukuumadda shaqaalaha uga soo caddeeyo in loo oggol yahay dib-u-codsi iyo in kale.

10.7 Wakhtiga Safarka Waalidka/Masuulka

Qofka shaqaalaha ah si loogu mushaaro wakhtiga uu Waalidka/Masuulku u baxo safar xannaano loogu oggolaaday, Waalidka/Masuulku waa in uu soo sheego ama taleefan soo diro haddii uu u baahan yahay xannaanada lagama maarmaanka u ah inta uu ku jiro wakhtiga safarka. Marka uu Gobolu oggolaado wakhtiga shaqada loo safro ee ay u baahan yihiin Waalidka/Masuulka, Qofka Shaqaalaha ah waxaa lagu mushaari doonaa mid dib loogu raaco xannaannadii hore ee waktiyada u-safarka shaqada. Haddii Qofka Shaqaalaha ah ee shatiga leh wakhtiga uu shaqada u safro ay ka badato toban (10) saacdood afar-iyo-labaatan (24) saacadood gudahood, mushaarka la bixinayo wuxuu noqonayaa mid ay la socoto gunno dheeraad ah.

QODOBKA 11
LACAGAHA KALA DUWAN EE LA BIXIYO

11.1 Lacagta Is-diiwaan-gelinta

Gobolku wuxuu bixin doonaa lacagta diiwaangelinta ah ee la bixiyo sannadkii mar ilaa iyo konton doollar ($50.00) halkii cunug oo uu hayo qof Shaqaale ah oo Shati leh. Gobolku wuxuu lacagtaas bixin doonaa in ka badan hal mar sannadkiiba haddii uu cunuggu ka tago xannaano oo uu dib ugu soo noqdo in ka badan lixdan (60) maalmood ka dib.

Shaqaalaha oo dhan waa in ay hubiyaan in ay lacagta diiwaangelinta ah ee ay ku dallacayaan Gobolka aysan ka badnayn inta ay ku bixiyaan diiwaangelinta laga rabo. Haddii uu qof Shaqaale ah Gobolka ku dallaco lacag ka badan lacagta ay ku dallacaan

Waalidka/Masuulka kale ee magaalada deggen, qofka Shaqaalaha ah wuxuu qiran doonaa in uu lacag dheeri ah qaatay oo waxay noqoneysaa in lacagtaas dib loogu soo celiyo Gobolka.

11.2 Lacagta oo La Isku Siiyo Da'da Carruurta; Sicirka Lacagta Lagu Hayo Ilmaha Sida Fiican u Socda

Nuunnayaashu waxa ay lacag ahaan ka sarreyn doonaan carruurta socod-baradka ah/iskoolka bilaabi raba ugu yaraan boqolkiiba shan-iyo-toban (15%); Ma dhaceyso in sicirka hoos loo dhigo iyada oo heshiiskan laga tixraacayo.

Shaqaalaha Shatiga Leh ee Xannaannada Carruurta Qoysaska waxaa u diyaar ah Sicirka Mushaarka Ilmaha Sida Fiican u Socda, codsi u gaar ah bilaha laba-iyo-toban (12) ilaa toddoba-iyo-toban (17), kaasoo u qalma boqol iyo shan-iyo-toban (115%) Sicirka Mushaarka Ilmaha Socodbaradka Caadiga ah. Sida uu dhigayo Qodobka 1.1 inta lagu kordhinayo sicirka mushaarka boqolkiiba waa in marka hore lagu isticmaalo Sicirkii Hore ee carruurta Socodbaraka ah si loo go'aamiyo Sicirka Mushaarka cusub ee Carruurta Socodbaradka ah. Sicirka Lagu haynayo Ilmaha Sida Fiican u Socda wuxuu ka sarreyn doonaa Sicirka Lagu Haynayo Ilmaha Caadiga ah boqolkiiba shan-iyo-toban (15%). Sicirka Mushaarka Caadiga ah waxaa loo isticmaali doonaa in lagu soo saaro nidaamka kale ee ah Lacagta oo La Isku Siiyo Da'da Carruurta, kaasoo lagu soo dajiyey baaragaraafka qoraalka bilowga ah.

11.3 Lacagta Lagu Qaadanayo Saacadaha Shaqada Ka Baxsan

Shaqaalaha shatiga leh waxa loo raacayaa sharciga haatan u yaalla saacadaha dheeraadka ah, gaar ahaan wixii saacado ah ee ka badan toban saac (10) maalintii, waxaa loogu darayaa maalin nuskeed oo mushaar ah (1/2) saacaddiiba, waxa kale oo uu Gobolku ugu darayaa hal maalin oo mushaar ah haddii ay shaqeeyaan hal maalin muddo ka badan shan-iyo-toban (15) saac oo ah afar-iyo-labaatan (24) saac gudahood.

Gobolku wuxuu si toos ah u oggolaan doonaa mushaar lagu bixiyo saacadaha aan caadiga ahayn, sida marka uu cunug u baahan yahay afartan (40) saacadood ama in ka badan bishii oo ah saacadaha aan caadiga ahayn. Saacadaha aan caadiga ahayn waa saacadaha ka horreeya 6:00 aroornimo, saacadaha ka dambeeya 6:00 galabnimo, ama saacadaha kale ee ah Sabtiga, Axadda ama maalmaha ciidaha. Mar haddii uu Qof Shaqaale ah oo Shati leh gaaro heerka afartanka (40) saacadood, Gobolku wuxuu oggol yahay in uu bil kasta bixiyo lacag bakhshiish konton ($50) doollar ah oo aan ahayn saacadda caadiga ah. Lacagta guud ee lagu bixinayo lacagta dheeriga ah ee saacadaha aan caadiga ahayn waa in aysan ka badan laba milyan oo doollar ($2,000,000) labadii sano, hal million oo doollar ($1,000,000) sannadka hore iyo hal million oo doollar ($1,000,000) sannadka labaad ee Heshiiska. Gobolku wuxuu oggoll yahay in uu warbixin siiyo Ururka Shaqaalaha 1-da Julaay 2010, kaas oo ku lug leh sida loo bixinayo wixii bakhshiish ah ee lagu bixinayo wixii ka baxsan saacadaha aan la shaqeyn.

11.4 Lacagta Lagu Aado Dibad-bax Waxbarasho ah

Gobolku waxa uu bixin doonaa labaatan doollar ($20) halkii cunug si loogu bixiyo lacagta oggolaanshaha iyo hawlaha kale ee waxtarka leh.

11.5 Baahida Gaarka ah

Gobolku wuxuu aqbali doonaa IFP, IEP, ama IHP haddii ay ku lug leeyihiin wixii kale oo macluumaad ah oo la iska rabo, sida ku cad WAC 388.290.0230 (2) oo ah caddeyn loo rabo baahida gaarka ah ee ah mid xannaano/sicir. Taariikhaha ugu dambeeya

oggolaanshaha baahida gaarka ah waa in ay la yimaadaan taariikhaha ugu dambeeya ee sicirka mushaarka caadiga.

Sida sharciga ku qoran baahida gaarka ah ama caddeymaha caafimaadka waa in ay la socdaan qoraalka kiiska carruurta. Caddeyn cusub ayaa la codsan doonaa marka ay jirto sabab lagu rumeysan karo in ay baahi gaar ah is baddeshay. Qofka Shaqaalaha ah waa in uu Gobolka u soo diro Codsiga Mushaarka Baahida Gaarka ah ee Dheeraadka ah ee carruurta xannaannada lagu hayo ee u baahan baahida gaarka ah.

Marka la soo oggolaado baahida gaarka ah, Qofka Shaqaalaha ah waxaa lagu mushaari doonaa laga soo bilaabo maalintii la codsaday baahida gaarka ah ee ay xannaannadu bilaabatay. Haddii aan la oggolaan baahi gaar ah Gobolku ma bixin doono lacag ka badan lacagta caadiga ah ee sicirka mushaarka

QODOBKA 12
SICIRKA LACAGTA MUSHAARKA

12.1 Sicirka Lacag-Kordhinta

Sicirka dhaqaalaha lagu kabayo Shaqaalaha Shatiga Leh wuxuu ahaanayaa sicirka uu ku dhaqangalo 30-ka Juun, 2009. (Eeg Qoraalka Sharraxaadda A)

Sicirka dhaqaalaha lagu kabayo Shaqaalaha aan Shatiga Lagu Xirin wuxuu ahaanayaa sicirka uu ku dhaqangalo 30-ka Juun, 2009. (Eeg Qoraalka Sharraxaadda A)
Shaqaalaha oo dhan waa in ay hubiyaan in sicirka ay ku dallacayaan Gobolku uusan ka badnayn sicirka ay iyagu si gaar ugu dallaci lahaayeen meelo kale oo ay u shaqeeyaan. Haddii uu qof Shaqaale ah Gobolka ku dallaco in ka badan inta ay ku dallaci lahaayeen Waalid/Masuul kale, qofka Shaqaalaha ah wuxuu oggolaan doonaa in la siiyey lacag dheeraad ah oo uu Gobolka dib ugu soo celin doono. Lacagtaas dheeraadka waxa la marin doonaa nidaamkii cabashada, laakiin lacagtaas lama marin doono Nidaamka Dhageysiga Caddaaladda ah.

12.2 Guddiga soo Jeediya Isbeddelka Sicirka lacagta

Gobolka, Ururka Shaqaalaha iyo ciddii kale ee xiiso u haysa ayaa ka qeybqaadan doona guddiga ku hawlan waxyaabo lagu beddli karo lacagta sicirka dhaqaalaha lagu kabo iyaga oo soo bandhigaya soo-jeedin ay u soo gudbin doonaan Waaxda Waxbarashada Bilowga ah (DEL) inta ka horreysa 1-da Febberaayo 2010. Laga bilaabo bisha Agoosto 2009 guddiga wuxuu u kulmi doonaa si joogto ah sidii ay iyagu go'aamiyeen.

12.3 Shaqaalaha aan Shatiga Lagu Xirin Sicirka ay Heli Karaan Halkii Saac

Sicirka mushaarka dheeraadka ah ee ay shaqaalaha aan shatiga laga rabin saacaddii ku hayaan walaalaha wuxuu noqonayaa in cunug kasta oo dheeraad ah oo xannaano ahaan loo hayo lagu helo sagaashan-iyo-siddeed iyo bar boqolkiiba (98.5%) inta lagu hayo cunugga koowaad (1^{-aad}).

12.4 Nidaamka Lacag-isu-celinta

DEL waxa ay ka qeybqaadaneysaa mashruuca nidaamka lacagta la isu celinayo oo ay hoggaanka u qabaneyso sida ay soo jeediyeen Guddiga Waxbarshada Aasaasiga ah iyo/ama hay'adda Waxbarista Washington Learns oo Shaqaalaha Carruurta Haya ee Shatiga Leh u ballanqaadday axdi lacageed in ay bixineyso wax aan ka badneyn afar boqol oo kun oo dollar ($400,000) si loogu gaaro waxbarsho leh heerar tayo oo kala duwan.

Gobolku waxa uu oggolaaday in uu ka baayactamo sidii uu raacayey haddii uu fuliyo barnaamijka nidaamka lacag-isu-celinta ah ee Shaqaalaha Shatiga leh.

QODOBKA 13
DARYEELKA CAAFIMAADKA SHAQAALAHA

13.1 Kharashka Caafimaadka Lagaa Bixinayo

Kolka loo eego shurrudaha Qodobkan ku ebyoon, Gobolku wuxuu oggol yahay in uu bil kasta lacag ku bixiyo shaqaalaha shatiga leh ee xaqa u leh in kharash laga daboolo kolka loo tixraacayo Heshiiskan oo lala galay SEIU 775 iyo hay'ad lagu aammino barnaamijka caafimaadka shaqaalaha, Multi-Employer Health Benefits Trust (oo loo yaqaan "Trust"). Wixii kharash ah ee laga daboolayo shaqaalaha shatiga leh sida kor ku xusan waxa uu u bilaaban doonaa kolka ku xigta oggolaanshaha maalgalinta dharci-dejinta ah. Barnaamijka hay'adda Trust waxa uu kharashka caafimaadka ka daboolayaa shaqaalaha shatiga leh, laakiin taasi waa inta uu Barnaamijka Caafimaadka ee Trust oggol yahay iyo haddii uu Gobolku waqti fiican ku bixiyo kharashka shaqaalaha la isku ogyahay bisha ka horreysa bishaas. Shaqaalaha shatiga leh ee la isku ogyahay ee aan keenin qoraal oggolaansho ah marka la iska goynayo lacagta mushaarka laga reebo sida ku xusan Qeybta 3-aad, lagama bixin doono kharashka caafimaadka lagu daboolo ilaa ay ka keenaan qoraal oggolaansho ah Gobolkuna waqti go'an ayuu ku bixiyaa wixii laga qaadi lahaa.

13.2 Ujeeddada Caafimaadka Shaqaalaha

Labada dhinac sida ay isku raaceen ee ujeedada caafimaadka shaqaalaha ee Qodobka 13-aad waa in kharashka caafimaadka lagu daboolo laga bixiyo shaqaalaha shatiga leh oo keliya haddii aysan heli karin meel kale oo ka dabooleysa kharashka caafimaadka, taasi waa xadka uu sharciga oggolyahay kolka loo eego ku-dhaqanka iyo shuruudaha uu dhigayo Qodobkan 13-aad.

13.3 Lacagta Dowladdu Shaqaalaha Ku Soo Biiriso

Wakhtiga xaadirka ah laga bilaabo 1-da Julaay 2009 ilaa iyo 30-ka Juun 2010, Gobolku wuxuu qof kasta oo ah shaqaale shati leh ku biirin doonaa ilaa shan boqol toddobaatan iyo kow iyo lixdan-iyo-shan senti oo doollar ($571.65) bil kasta, taasoo lagu dhiibayo hay'adda ammaanka ee Trust, guud ahaan wixii uu Gobolku ku biirinayo, kamana badaneyso saddex boqol konton-iyo-shan kun laba boqol iyo siddeed doollar ($356,208.00) bil kasta dhammaan shaqaalaha shatiga leh ee xaqa u leh marka laga reebo lacagta mushaarka laga gooyo ee hoos ku qoran. Wakhtiga xaadirka ah laga bilaabo 1-da Julaay 2009 ilaa iyo 30-ka Juun 2010, Gobolku wuxuu qof kasta oo ah shaqaale shati leh ku biirin doonaa ilaa shan boqol toddobaatan iyo kow iyo lixdan-iyo-shan senti oo doollar ($588.80) bil kasta qof kasta oo ah shaqaale oo shati leh, taasoo lagu dhiibayo hay'adda ammaanka ee Trust, guud ahaan wixii uu Gobolku ku biirinayo, kamana badaneyso saddex boqol lixda-iyo-lix kun siddeed boqol iyo sagaasha-iyo-afar iyo labaatan-iyo-afar senti oo doollar ($366,894.24) bil kasta dhammaan shaqaalaha shatiga leh ee xaqa u leh marka laga reebo lacagta mushaarka laga gooyo ee hoos ku qoran.

A. Gobolku wuxuu sameynayaa lacag-bixinta kor ku xusan ka dib kolka ay shaqaalaha la isku ogyahay ee shatiga leh doortaan in ay wax ka bixiyaan lacagta, taas oo ay sameynayaan Dadka hay'adda La Aamminay ee Trust, iyaga oo siinaya isla Trust. Lacagta la bixinayo ee shaqaalaha la isku ogyahay ee shatiga leh kama yaraan karto toddoba-iyo-toban doollar ($17) bil kasta, lacagtaas waxaa bil kasta goosanaya Gobolka oo ka reebaya shaqaalaha la isku ogyahay ee shatiga leh, lacagtaasi Gobolku wuxuu bil kasta siin doonaa hay'adda Trust. Gobolku

wuxuu ka shaqeyn doonaa wixii maamul iyo sharci ah, nidaamyo iyo habab lagu fududayn doono lacagtaas, iyada oo laga goynayo lacagta dhaqaalaha lagu kabo ee mushaarka shaqaalaha la isku ogyahay ee shatiga leh, weliba gobolku wuxuu la shaqeyn doonaa Ururka Shaqaalaha iyo Trust si uu si wacan ugala xiriiro shaqaalaha shatiga leh ee heeganka ah iyo in uu la shaqeeyo wixii sharci ah ee khuseeya.

B. Gobolku wuxuu maamul saddexaad oo u dhaxeeya iyaga iyo Trust u gudbin doonaa nidaamka mushaarka shaqaalaha shatiga leh ee la isku ogyahay, waxa kale oo la gudbinayaa macluumaadka kale ee ay caadi ahaan Trust u baahan karaan si ay u fududeeyaan lacagta la ururiyo bil kasta ee lagu go'aamin doono wixii xaq loo yeelan lahaa. Maamulka saddexaad ee u dhaxeeya gobolka iyo Trust wax ay go'aamin doonaan sidii xaq loo yeelan lahaa sida hoos ku qoran, waxaa la bilaabi doonaa in Gobolka lagu dallaco lacagta daryeelka caafimaadka ee shaqaalaha xaqa u leh.

C. Gobolka wuu sameyn doonaa mushaarka laga rabo oo weliba wuxuu maamulaha gacanta saddexaad ee hay'adda ammaanka ee Tust u gudbinayaa waraaqaha warbixinta mushaarka kolka la gaaro 30^{ka} bil kasta si loo bixiyo mushaarkii bisha dhammaatay. Lacagta yare ee ay bixinayaan qoyska carruurta loo hayo waa in bixiyaan bisha 30^{keeda}(ama taariikhdaa uu Gobolku mushaarka ku bixiyo bisha soo socota sida ay isku ogyihiin xubnaha SEIU 775) (bisha labaad ka dib kolka shaqada la bilaabo), iyo ka dib marka uu Gobolku hay'ada Ammaanka ee Trust ka helo waraaqaha soo-gudbinta ee sheegaya in uu qof shaqaale ah yahay Qof Carruur haya oo la oggolaaday oo shati leh oo sugaya lacag uu shaqeystay.

D. SEIU 925 Trust waxa ay ku wargelisay lacagta la iska rabo ee la doonayo in lagu maalgeliyo qorshaha hadda yaalla ee arrinta caafimaadka. Lacagta la ururiyo ee halkan la isku afgartay waxa ay u taagan tahay lacagtii Gobolka waajibka ku ahayd inta lagu guda jiro nidaamka Heshiiska. Gobolku kuma khasbana in uu bixiyo lacag dheeraad ah ama lacag ka duwan lacagaha kale taas oo ay qorsheeyaan hay'adda ammaanada ee Trust iyo Xubnaheeda Guddiga Ammaanada u xil saaran.

13.4 Sida Arrin Xaq Loogu Yeesho

Shaqaalaha shatiga leh ee xaqa u leh caafimaadka waa shaqaale shati leh oo:

A. soo buuxiyey waraaqaha Trust oo dhan;

B. soo doortay in mushaarkooda laga gooyo lacagta la iska ururiyo ee kor ku xusan;

C. oo la daryeelay ugu yaraan lixdan (60) meelood oo si wadajir ahaan ah lacag loogu kabay [kow (1) halkii meelba waxay la mid tahay hal (1) maalin oo buuxa ama laba (2) maalmood oo nusnus ah] inta lagu gudo jiro bisha Qof Shaqaale ah loo go'aamiyey in uu xaq u yeesho daryeel caafimaad;

D. ay ku qancaan waxyaabaha kale ee ay hay'adda ammaanada ee Trustees go'aamin karto; Iyo

E. kuwa aan haddii kale xaq u lahayn in ay helaan daryeel caafimaad oo ay ku helaan si kale oo qoyskooda ah ama meelo kale oo ah meelo looga helo goob shaqo ahaan.

Hay'adda la aamminay ee Trust waxa kale oo ay wax ku xaddidi kartaa marka ugu horreysa inta aan caymiska caafimaadka la bilaabin.

13.5 Dhibaato La'aan Iyo Waxyeello La'aan

Lacagta Trust ee qorshaha caafimaadka caymiska ama lacagta daryeelka caymiska caafimaadka waxa ay soo mareysaa isla hay'adda la aamminay ee Trust. Qofka caymiska ku jira, Hay'adda Ammaannada Trust Fund ayaa ka dabooleysa oo ka dhigeysa qof aysan waxba ka soo gaari karin wixii masuuliyad ah ee uga timaadda Gobolka, dhammaanba qeybaha iyo waaxyaha kala duwan ee Gobolka Washington, kafiilladooda ama/iyo wakiilladooda, wixii qaansheegad ah ee ay u soo raacdaan dadka leh dhaxalka caymiska, shaqaalaha caafimaadka, shariikadaha la xiriira, dadka caymiska haysta ama shaqaalaha uu Heshiiskan ka daboolayo kharashka. Ma dhaceyso in la sameeyo wax Heshiiskan ka baxsan oo uu sharcigu mamnuucay.

13.6 Xisaabi Xil Ma Leh iyo Xaqiijinta Shaqada Wanaagsan

Hay'adda la aamminay ee Trust waxa ay sannad kasta SEIU 925 u gudbin doontaa wixii xisaabi xil ma leh ah oo ay Trust u sameyso hay'ad kale oo ah mid la aqoonsan yahay oo xisaabaadka ku shaqo leh. Ururka Shaqaalaha ee SEIU dukumiintigaas wuxuu u diyaarinayaa Gobolka.

13.7 Hay'ad Kale oo Lagu Doorto Haynta Ammaanada

Labada Dhinac ee ka wada hadlaya mushaarka waxa ay isku ogyihiin in ay Trust tahay hay'ad sharci ahaan kala shaqeyneysa arrimaha u dhaxayn kara shaqaalaha iyo maamulka iyo in ay tahay meel kale oo saddexaad oo Heshiiskan ku jiri karta laakiin aysan wax shaqa ah ku lahayn mushaarka ay Labada Dhinac ka wada hadlayaan. Sida Heshiiskan ku cad Trust ma aha, ma noqon doonto, looma tixgelin karo, loomana qaadan karo in ay tahay xafiis dowladeed, lacag dowladeed, wakaalad ama qorshe dhaqaale oo hela lacag dowladeed. Gobolku wuxuu oggol yahay in uu sharciga ku qaban karo shuruudaha ay Trust Heshiiskan ku Caddeyso sida Heshiiskan lagu muujiyey oo la isku waafaqay.

13.8 Ciddii Lagu Bedeli Lahaa Hay'adda Ammaanada ee SEIU 775 Trust

Haddii ay dhacdo in ay Dadka u Shaqeeya Trust diidaan in ay aqbalaan heshiiskan, ama haddii ay dhacdo in uu Ururka Shaqaaluhu doorto meel kale oo u xilsaaran daryeelka caafimaadka shaqaalaha, kolkaas sida ku cad qodobkan wax walba sidoodii ayey ahaan doonaan oo waxaa lala shaqeyn doonaa hay'adda cusub ee la magacaabo. Labada dhinac waxay isku raacsan yihiin haddii uu Ururka Shaqaalaha doorto inaan la isticmaalin hay'adda ammaanka ee Trust ee SEIU 775, labada dhinac ayaa kulmi doona si ay uga faaloodaan wixii SEIU 925 ay ku beddeli karto daryeelka caafimaadka Qofka Shaqaalaha ah.

QODOBKA 14
TABABARKA IYO AQOON-KORORSIGA

14.1 Tababarka – Shaqaalaha Shatiga leh

Shaqaalaha Shatiga Leh ee caawimaadda u baahan, Gobolka ayaa u sii wadi doona in uu siiyo lacag deeq waxbarasho ah (isla sidii lagu siin jiray miisaaniyaddii labada sano ahayd ee 07-09 ama wax ka badan haddii ay DEL go'aamiso in ay muhiim tahay), waxa la doonayo waa in wax laga bixiyo kharashka lagu bilaabayo labaatanka (20) saacadood

ee tababarka STARTS ama tababar kale oo u qalma, iyo tababarka tobanka (10) saacadood ee joogtada ah.

Sida hadda la isku ogyahay oo ay Shaqaaluhu dan ugu jirto Gobolku wuxuu sii wadi doonaa in uu oggolaado in ay Shaqaalaha Shatiga leh sannadkii ku soo dallacaan kharashka saddex (3) beri oo meheraddooda (tababar) horumar ah u noqon karta. Shaqaalaha shatiga leh sida caadiga ah ayaa loo mushaari doonaa marka ay tababar soo qaataan maalmaha shaqada ama sabtiga iyo axadda, iyadoo maalintaas loo tixgelinayo maalin shaqo oo kale.

14.2 Shati-u-helidda iyo Tababarka Shaqaalaha aan Shatiga Lagu Xirin

A. Gobolku wuxuu oggol yahay in uu sannad koowaad ku diyaariyo lacag dhan boqol iyo konton kun oo doollar ($150,000), toddobaatan iyo shan kun oo doollar ($75,000), iyo in uu sannadka labaad ee heshiiska ku diyaariyo todobaatan iyo shan kun ($75,000), si lacagahaas loogu caawinayo shaqaalaha aan shatiga Laga Rabin:

1. In la noqdo Qof Shaqaale ah oo Shati ku haysta Xannaannada Guryaha; Iyo/ama

2. si ay u qaataan casharro ay DEL aqoonsan tahay.

Shaqaalaha aan Shatiga Laga Rabin ee noqda Shaqaale Shati Leh oo Guryaha ku shaqeeya waxaa la siin doonaa laba boqol iyo konton doollar ($250) oo la siin doono lixdan (60) beri gudahood kolka ay shati helaan.

Shaqaalaha aan Shatiga Laga Rabin waxaa loo soo celin doonaa lacagta uga baxda tababarka ay DEL aqoonsan tahay ilaa laba boqol oo doollar ($200).

Lacagta loo soo celin doono Shaqaalaha aan Shatiga Laga Rabin waxaa loo bixin doonaa sida loo soo kala horreeyo ilaa ay ka dhammaato boqol iyo konton kun oo doollar ($150,000) ama ilaa uu Heshiiskan ka dhacayo, hadba kii soo hormara.

Gobolku wuxuu shaqaalaha aan shatiga laga rabin u oggol yahay in ay ku soo dallacaan afar (4) saacadood oo ah tababarka khasabka ah ee mushaarka saacad ahaan loogu siiyo halkii cunug.

B. Qorshaha Lagu Dhiirri-gelinayo Tababarka Shaqaalaha aan Shatiga Lagu Xirin ee Xannaannada Carruurta

Gobolku wuxuu maalgelin doonaa qorshaha tababarkaas hoos u dhiciisa laga bilaabo 100% ilaa 98.5% ah sicirka ilamaha dheeraadka ah. Labada dhinac ee heshiiska wada gaaray waxa ay isku af-garteen in lacagta bakhshiish ah lagu ekeysiiyo siddeed boqol labaatan-iyo-lix kun oo doollar ($826,000)[afar boqol toban-iyo-saddex kun ($413,000) kunturaadda sannad kasta], lacagtaasoo ka yar lacagta loo qoondeeyey iyo kharashka ku baxa maamulka. Si dhaqso loogu helo awgeed lacagta abaalmarinta ah degdeg looma sii dalban karo.

Shaqaalaha xannaannada ee aan shatiga lagu xirin ee ugu yaraan soo qaata 10 saacadood oo ah tababar la aqoonsan yahay waxa ay xaq u yeelan doonaan ilaa iyo $600 oo bakhshiish ah; lacagtaas waxaa la siin doonaa bisha ku xigta kolka uu tababarku dhammaado.

Kolka la soo dhammeystiro 10 saacadood oo tababar ah oo la qaato lix boqol oo doollar ($600) oo dhiirrigelin ah, qofka shaqaalaha carruurta ah ee qaata 10 saacadood oo dheeraad ah oo ah tababar la aqoonsan yahay waxaa sannadka labaad ee heshiiska la siin doonaa lix boqol oo doollar ($600) oo dhiirrigelin kale ah.

Ururka Shaqaalaha ee SEIU wuxuu isticmaali doonaa ilaa iyo sideetan kun oo doollar ($80,000) oo lagu bixinayo tabarbarrada STARS, lacagtaas oo ka mid ah siddeed boqol labaatan iyo lix kun ($826,000) oo doollar oo laga bixinayo kharashka kirada meelo qiimo jaban (oo uusan lahayn Ururka Shaqaalaha laakiin Ururka Shaqaalaha waa inuu soo bandhigaa qiimaha kirada dhabta ah), iyo in lacagtaas laga bixiyo kharashka ku baxa daabacaadda iyo boostada marka iidheh loo sameynao tababarka. Ururka Shaqaalaha ee SEIU wuxuu foojarro ama waraaqo lacag u qalma u soo gudbinayaa Gobolka si uu ugu celiyo lacagta tababarka.

10-ka saacadood ee tababarka ah waxay ka koobnaan karaan tababar la isuggeeyey oo ka mid ah tababarrada STARS oo noqon kara mid intarnetka ah ama mid ay dadku yimaadaan. tababar laga qaato Xafiiska Maamulka Guud ee Waxbarista Dadweynaha iyo Barnaamijka Raashinka Carruurta iyo Dadka Waaweyn (CACFP), kaas oo ay gobolka Washington u maamusho hay'adda OSPI; ama in laga qeybqaato kooxaha la yiraahdo "Ciyaar oo Baro" oo laga helo qaar ka mid ah degmooyinka gobolka, taas oo loogu tala galay qoysaska, saaxiibbada iyo dadka jaarka isu ah ee is-daryeela, ama tababar kale oo ay aqoonsan tahay Waaxda Waxbarashada Bilowga ah (DEL). Tababarrada oo dhan waa in la soo caddeeyaa oo weliba aqoonsi laga helaa DEL.

Marka la dhammeysto tababarka, Qofka Shaqaalaha ah wuxuu Gobolka u soo gudbinayaa koobbiyaasha shahaadooyinka si lacagtii uga baxday loogu soo celiyo. Qofka Shaqaalaha ah waxaa lacagta dib laga siin doonaa muddo ku siman lixdan (60) maalmood.

QIIMEYN: Labada dhinac waxay oggol yihiin in la qiimeeyo wixii waxtar ah ee ka soo baxa barnaamijka marka uu dhammaado sannadka koowaad iyo sannadka labaad. Gobolka iyo Ururka Shaqaalaha waxa ay isku raacsan yihiin in uu hadafka mashruucu noqdo in lacagta maalgalinta ah oo dhan loo isticmaalo sidii shaqaalaha loogu dhiirri-gelin lahaa tababar iyo in lagu dedaalo sidii lagu heli lahaa dhaqaale loogu hawlgalo daryeel heer sare ah oo tayo wanaagsan.

14.3 Tababarka Khasabka ah ee Kabista Dhaqaalaha ah

Shaqaalaha oo Dhan waxaa looga baahan yahay in ay qaataan tababar dheeraad ah ugu yaraan hal mar inta lagu gudajiro heshiiskan si ay xaq ugu yeeshaan in ay helaan kabis dhaqaale. Gobolku wuxuu bixin doonaa tababar khasab oo loo furo Shaqaalaha jooga meel walba, tababarka waxaa ka mid ah mid intarnet ah oo la qaato waqtiyo kala duwan, mid la qaato maalintii ama mid la qaato fiidadkii iyo sabtiga iyo axadda. Gobolku wuxuu bixin doonaa lacagta ku baxeysa tababarka, laakiin ma bixin doono lacagta shaqada ee ka baaqaneysa Shaqaalaha tababarka qaadanaya.

14.4 Tababar Khasab ah oo ku Xiran Shati-u-helidda WACs

Dhammaan shaqaalaha Shatiga leh waxaa laga doonayaa in ay tababar ku qaataan shatiga WACs ugu yaraan hal mar inta lagu guda jiro xilliga heshiiska sida ay DEL u soo tabin doonto. Gobolku wuxuu bixin doonaa tababar WACs khasab ah si shatiga lagu helo, kaas oo loogu tala galay Shaqaalaha Shatiga leh ee jooga meel walba, tababarka waxaa ka mid ah mid intarnet ah oo la qaato waqtiyo kala duwan, mid la qaato maalintii ama mid la qaato fiidadkii iyo sabtiga iyo axadda. Gobolku wuxuu bixin doonaa lacagta ku baxeysa tababarka, laakiin ma bixin doono lacagta shaqada ee ka baaqaneysa Shaqaalaha tababarka qaadanaya.

QODOBKA 15
BARNAAMIJKA RAASHINKA

15.1 Shaqaalaha carruurta haya ee aan shati laga rabin ee loo oggolaaday lacag kabis ah oo ay bixinayaan Gobolka Washington barnaamijyadiisa kaalmada xannaannada, marka ay xannaano carruur guryahooda ku hayaan waxay wax ka heli karaan Barnaamijka Cuntada ee Carruurta iyo Dadka Waaweyn (CACFP) ee Waaxda Baaraha ee Dowladda Mareykanka (USDA). In barnaamijkaas wax laga helo wax ay ku xiran tahay in la sameeyo heshiis saxiixan oo dhexmara qofka shaqaalaha ah ee aan Shatiga Laga Rabin iyo Qofka Guri Ugu Deeqa Xannaanada Qoysaska kaas oo haysta heshiis laga soo oggolaaday Maamulka Sare ee Xafiiska Waxbarista Dadweynaha. Shaqaalaha aan Shatiga laga rabin waa in ay raacaan shuruudaha looga qeybqaadanayo barnaamijka CACFP.

Gobolku waxa uu soo gudbin doonaa liiska Dadka Guryahooda Ugu Deeqa Xannaanada Qoysaska si ay u isticmaalaan oo shaqaalaha aan shati Laga Rabin. Sida lagu helo CACFP waxa ay ku xiran tahay hadba sida ay tahay tirada iyo awoodda dadka deeqda bixiya iyo tirada dadka soo codsada. Sidaas awgeed in helo waxa ay u baahan tahay in muddo la sugo iyada oo ay ku sii xiran tahay tirada dadka kaa horreeya.

Bisha Julaay Gobolku wuxuu hal sano ka hor Ururka Shaqaalaha ku soo wargelin doonaa shaqaalaha ka qeybqaadanaya barnaamijka cuntada ee carruurta iyo dadka waaweyn, CACFP. Warbixinta la soo saaro waxay isugu jireysaa liiska dadka shaqaalaha ah oo lagu garan karo lambarkooda shaqaalaha.

QODOBKA 16
FASAXYADA IYO MAALMAHA SHAQADA LAGA MAQNAADO

16.1 Fasaxyada

Haddii Qofka Shaqaalaha ah ee Shatiga Leh uusan shaqeyneyn fasaxyada soo socda, waxaa lagu mushaari doonaa sidii maalmaha shaqada ee carruurta la hayey:

Maalinta Sannadka Cusub	1-da Jannaayo
Maalinta Lagu Xuso Martin Luther King Jr.	Isniinta Saddexaad ee bisha Jannaayo
Maalinta Madaxweynaha	Isniinta Saddexaad ee bisha Feberaayo
Maalinta La Xuso Askartii Dhimatay	Isniinta Ugu Dambeysa ee bisha Meey
Maalinta Xornimada La Qaatay	4-ta Julaay
Maalinta Shaqaalaha	Isniinta Ugu Horreysa ee Bisha

	Sebteembar
Maalinta Askarta Da'da ah Lagu Xuso	11-ka Nofeembar
Maalinta Mahadcelinta	Khamiista Afaraad ee Nofeembar
Maalinta ka dambeysa Feystada mahadcelinta ee Thanksgiving	
Maalinta Ciidal-masiixiga	25-ka Diseembar

16.2 Maalmaha Shaqada Laga Maqnaado

Gobolku wuxuu Shaqaalaha Shatiga leh ku mushaari doonaa ilaa iyo shan (5) maalmood bil kasta marka ay maqan yihiin carruurta lagu hayo barnaamijka kabista dhaqaalaha. Shanta (5) cisho ee maqnaanshaha loo oggol yahay bil kasta looma gudbin karo bilba bisha ay ku xigto.

QODOBKA 17
XUQUUQDA GOBOLKA

17.1 Xuquuqda Maamulka Guud

Waxaa la fahamsan yahay oo ay labada dhinac iku raaceen in uu Gobolku leeyahay xuquuqda guud ee maamulka. Haddii laga reebo wixii is beddel ah oo uu Heshiiska sameeyo, Gobolka ayaa iska leh xuquuq kasta iyo awoodda lagu maamulayo looguna shaqeynayo meelaha iyo barnaamijyada uu gobolku leeyahay. Labada dhinac ee heshiiska waxa ay isku raaceen in aan xuquuq kasta oo Heshiiskan ku qoran looga harin Gobolka oo keliya, iyo in uusan Gobolka oo keliya xaq u lahayn in uu go'aansado sidii uu ugu dhaqmi lahaa xuquuqda maamulka. Sida ku cad sharciga RCW 41.56 labada dhinac waxay ogsoon yihiin in ay arrimaha dhaqaalaha u ahaan doonaan kuwa si joogto ah loogu baayactamo.

17.2 Xuquuqda Gobolku Gaarka u Leeyahay

Gobolka, wakiilladiisa iyo hawl-wadeennadiisa ayaa tusaaleyaal u ah in xuquuq badan iyaga looga hara, laakiin xuquuqaha noocaas ah waxaa lagu xaddidi karaa shuruudo Heshiiskan ku jira, xuquuqda laga harayo qaar ka mid ah waxa ay noqonayaan kuwa sheegaya:

A. in shaqada lagu qabto iyada oo lagu fulinayo sharciyada hoose ee Gobolka u deggan;

B. in sharciga lagu sameeyo waxyaabaha uu awood kuu siin karo, sida in loo adeego danaha Gobolka, barnaamijyadiisa, ujeeddooyinkiisa, hawlihiisa kale, iyo sida ay howluhu u kala muhiimsan yihiin;

C. si loo gaaro hadafka danaha Gobolka, barnaamijyadiisa, ujeeddooyinkiisa, hawlihiisa kale, iyo sida ay howluhu u kala muhiimsan yihiin, waa in qorshe la sameeyo, la maamulo oo lala socdo hadba wixii la awoodo sida miisaaniyadda iyo siyaabaha loogu shaqeynayo; hase yeeshee qoraalka sare looma fasiran karo in uu hor istaago xuquuqdii Ururka Shaqaalaha, sida xuquuqda loogu hadlo sida loo qeybinayo miisaaniyadda taas oo ka duwanaan karta sida uu Gobolku soo jeediyo;

D. in la maareeyo, la maamulo, iyo in lala socdo hawlaha Gobolku uu ka fulinayo barnaamijyada iyo adeegyada;

E. in la sameeyo, la beddelo oo isha lagu hayo sharciyada hoose, nidaamyada, sharciyada waaweyn oo la go'aamiyo hababkii iyo sidii hawlaha loo fulin lahaa;

F. in kor loo soo qaado waxbarista shaqaalaha iyada oo laga filayo in ay soo gaaraan ilaa xad heer lagu xisaabtami karo aqoontooda kolka laga reebo kuwa uu ka reebay heshiiskan oo cuskanaaya Qodobka 14-aad ee Tababarka;

G. in la sameeyo oo la hirgeliyo qoraallo kunturaad ah iyo wixii kale oo qalab ah oo loo baahdo oo muhiim u ah waajibaadka Gobolka iyo sida Gobolku awooddiisa wax ugu muquunin karo, kunturaadahaas waxaa ka mid ah hay'adaha dowladda iyo kuwa dadweynaha, ururrada ama shirkadaha waaweyn iyo shaqsiyaadka caadiga, intaasuba in ay bixiyaan wixii adeeg ah oo loo qabto;

H. in la go'aamiyo maamulka ururka, sida shaqaaleynta, soo-xulashada, haysashada arrin iyo dallacsiinta oo ka mid ah meelaha uusan Heshiiskan taaban;

I. in la dheereysto, la xaddido, ama cid kale kunturaad ahaan loo siiyo qaar ka mid ah ama dhammaanba barnaamijyada iyo/ama hawlaha Gobolka haddii aysan jirin wax uu reebayo Qodobka 8-aad ee Guddiga Shaqaalaha/Maamulka iyo wixii gaar ku ah shaqada kunturaad-bixinta kooxda baayactameysa;

J. in la qaato wax kasta oo ficil ah oo uu Gobolku u soo hindiso in lagu fuliyo hawlaha xaaladaha degdegga ah. Gobolku wuxuu ahaanayaa midka keliya ee go'aansan kara ilaa iyo xadka xaalad degdeg ah lagu dhawaaqi karo iyada oo loo eegayo sida macquulka ah iyo hadba heerka ay gaareyso;

K. in la beddelo qaar ka mid ah ama dhammaan shuruudaha hawlaha iyo shaqada si adeegyada loogu sameeyo si hufnaan iyo waxtar leh kolka la raacayo sharciyada cusub ee hadda jira iyo/ama kuwa horay u jiray, sharciyada iyo shuruudaha la tiigsanaayo iyo/ama kuwa ka soo jeeda dowladda dhexe oo burin kara hannaanka uu Gobolku u qaban lahaa adeegyada;

L. in la go'aamiyo hababaka, qalabka casriga ah sida laga yeelayo, lambarrada iyo meelaha hawlaha shaqaalaha loo kala qeybinayo;

M. in la ambaqaado iyo in kor loo soo qaado waxyaabaha ka soo baxa hawlaha dadweynaha loo qabto ee Gobolka laga sugayo.

17.3 Waxyaabaha ka Baxsan

Waxyaabaha dusha ku xusan ee uu gobolku xaqa u leeyahay waa ay ka baxsan yihiin oo kuma jiraan xuquuqda kale ee Gobolka ee aan ku jirin ama aan lagu dhex sheegin waajibaadka, waxqabadka iyo awoodda ku xusan sharciyada RCW 41.56 iyo RCW 43.215 ilaa xad aan si cad loogu xaddidin Heshiiskan. Xuquuqda ku-dhaqanka iyo in aan lagu dhaqmin sharci jira oo uu Gobolku leeyahay looma fasiran karo in ay tahay in Gobolka laga qaaday wax xuquuq ah.

17.4.1 **Dacwad Ku Oogista Gobolka**

Ma jireyso ficil uu Gobolku sameeyey oo ay xuquuqda maamulku ka dambeyso oo aan cabasho laga sameyn karin ama laga codsan karin in gar loo dhigto ama laga sameyn dacwad loo dhan yahay; midda keliya ee gobolka looga harayo waa marka ay ku dhaqmaan shuruudaha ku cad Heshiiskan.

17.5 Fulinta Sharciga Waajibka ah

Sida lagu caddeeyey sharciga RCW 41.56, Heshiiskan gebi ahaan waa mid hoos yimaada xaqa ay Dadka Sharciga Sameeya ee Gobolka Washington u leeyihiin in ay oggolaadaan ama in aysan oggolaan lacagaha la bixinayo iyo dhaqaalaha kale ee shuruudaha heshiiskan ku qoran. Heshiiskan waxaa sii dheer in ay Dadka Sharciga Sameeya leeyihiin xuquuqda lagu sameyn karo barnaamijyo wax lagu beddeli karo si Gobolka loogala shaqeeyo adeegyada arrimaha barnaamijyada dhaqaalaha xannaannada carruurta, adeegyadaas waxaa ku jira siyaabaha ay waalidku xaq wax ugu yeeshaan, masuulka waalid ahaan u sharciyeysan, shaqaalaha xannaannada carruurta qoysaska ee ka qeybqaadanaya barnaamijyada dhaqaalaha xannaannada carruurta, iyo noocyada hawlaha ay shaqaaluhu qabtaan.

Ma jiraan wax Heshiiskan ku jira si ay ahaataba oo loo fasiran karo in looga jaro, lagu beddelo ama haddii kale lagu yareynayo xuquuqda la soo sheegay; sidoo kale ma jiraan wax yareyn kara xuquuqda Waalidka/Masuulka sida ku cad Qodobka 3-aad.

17.6 Waajibka Lagu Baayactami Karo

Ma jiraan wax uu Heshiiskan ka kooban yahay oo hoos u dhigi kara waajibaadka ay labada dhinac uga wada hadli karaan iyo/ama uga wada xaajoon karaan arrimaha ku habboon sharciga iyo in uu Gobolku sharci ahaan xukumi karo arrimaha la soo sheegay oo dhan. Arrimahaas waxaa ka mid ah gaar ahaan lacagta la isu celiyo; arrimahaas iyo sicirka dhaqaalaha iyo lacagta waxbarashada la isugu soo celiyo oo ay ka mid tahay nidaamka lacag-isu-soo celinta; caafimaadka iyo dhaqaalaha cayrta; tababarka iyo aqoon-kororsiga meheradda lagu shaqeysto; iyo arrimaha kale ee dhaqaalaha ah.

QODOBKA 18
NIDAAMKA HESHIISKA

18.1 Arrimaha Ku Lammaan Kunturaadda Lagu Heshiiyo

Heshiiskan waxa uu hoos imaanaya sharciyada hadda jira iyo kuwa mustaqbalka la sameyn doono ee u yaalla dowladda dhexe, gobolka iyo dowladda hoose; waxa kale oo uu hoos imaanaya shuruudaha xukuumadda iyo dowladda kuwaas oo aan wax shaqo ah ku lahayn in lagala hadlo arrimaha ku xiran mushaarka. Haddii ay dhacdo Heshiiskan ama shuruudaha uu ka kooban yahay in ay jabiyaan dhinac ka mid labada dhinac, sharci jabinta noocaas ah oo uu dhinac sameeyo ma burineyso in sharciga intiisa kale si buuxda loo adeegsado. Kolka la arko in uu sharciga ku tumanaayo hal dhinac, labada dhinacba waa in si degdeg ah loo kulmaa oo loo wada hadlaa si ixtiraam leh oo shuruudaha lagu beddelo kuwa kale haddii ay jiraan shuruudo loo arko wax sharciga ka baxsan, aan jirin, ama aan lagu dhaqmi karin.

18.2 Nidaamka Heshiiska

Heshiiskan waxa uu ka bilaabanayaa 1-da Julaay, 2009 isaga oo si buuxda u shaqeyn doona ilaa laga gaaro 30-ka Juun 2011. Labada dhinac waxa ay wada hadalkooda bilaabi doonaan inta aan la gaarin 1-da Feberaayo 1 2010. Haddii aan la sameyn heshiis lagu beddelo midkii hore, ama haddii ay dhacdo in ay dadka sharciga sameeya oggolaan waayaan lacagta lagu maalgelinayo qeybo cusub oo heshiiska ka mid ah si loogu beddelo heshiiskii hore taariikhdu marka ay tahay 30-ka Juun 2011, waxaa shaqeyn doona gebi ahaanba Heshiiskii horay u jiray ilaa

laga gaaro heshiis cusub oo ku xigi kara, laakiin xilliga heshiiska xiga waa in uusan ka badan hal (1) sano ka dib kolka la dhaafo taariikhda.

QODOBKA 19
HESHIIS BUUXA

19.1 Labada dhinac waxa ay halkan ku yeeleen inta lagu guda jiro wada-hadalka heshiiskan ka soo baxa in uu dhinac kasta xuquuq buuxda iyo fursad u haysto in la soo bandhigo baahi iyo fikrad cusub iyada oo si ixtiraam leh loo muujinayo wax kasta oo la doonayo in laga saaro sharciga, iyo is-fahamka heshiiska cusub ee la gaaro in ay labada dhinac si buuxda ugu hirgelin doonaan isla Heshiiskan. Waxa kale oo si fiican loo fahmay in ay Heshiiskan si buuxda gebi ahaanba ugu cad yihiin shuruudaha u dhaxeeya labada dhinac, oo uu weliba yahay Heshiis isaga oo idil ka yimid labada dhinac, iyo labada dhinac iyaga nafsad ahaantooda iyo xubnaha dhinacooda ka soo jeeda, in ay ka tanaasulaan wixii sheegasho iyo baahi ah oo ay leeyihiin ama u yeelan karaan wixii fal illowsho ah oo noqon kara dhinacooda, dhinaca xubnahooda, wakiilladooda, shaqaalahooda ama ciddii kale oo ay soo dirsadaan.

19.2 Heshiiskan oo halkan lagu caddeeyey qoraal ahaan waxa uu u taagan yahay Heshiis u dhaxeeya laba dhinac mana jireyso wax af laga yiri iyo wax la qoray oo lagu dari karo oo ka sara mari kara shuruudaha la socda ilaa ay labada dhinac si wadajir ah isugu raacaan sida ku cad Heshiiskan.

Qoraalka Sharraxaadda A

Sicirka Ugu Badan ee Xannaannada Carruurta

Laga bilaabo 1–da Julaay, 2009

Guryaha Shatiga Leh – Maalin Buuxda	Nuunne (0-11 bilood)	Ilmaha Sida Fiican u Socda (12-17 bilood)	Cunug Socod-barad ah (18-29 bilood)	Cunug Iskool Ku Dhow (2 sano iyo bar-5 sano*)	Carruurta gaarta da'da iskoolka (5 – 12 sano)
Qeybta 1-aad	$24.29	$24.29	$21.12	$21.12	$18.78
Degmada Spokane	$24.84	$24.84	$21.60	$21.60	$19.21
Qeybta 2-aad	$25.65	$25.65	$22.30	$19.95	$19.95
Qeybta 3-aad	$34.03	$34.03	$29.33	$25.81	$23.46
Qeybta 4-aad	$40.04	$40.04	$34.81	$29.33	$28.16
Qeybta 5-aad	$26.99	$26.99	$23.46	$22.30	$19.95
Qeybta 6-aad	$26.99	$26.99	$23.46	$23.46	$22.30

Guryaha Shatiga Leh – Maalin Nuskeed	Nuunne (0-11 bilood)	Ilmaha Sida Fiican u Socda (12-17 bilood)	Cunug Socod-barad ah (18-29 bilood)	Cunug Iskool Ku Dhow (2 sano iyo bar-5 sano*)	Carruurta gaarta da'da iskoolka (5 – 12 sano)
Qeybta 1-aad	$12.14	$12.14	$10.56	$10.56	$9.39
Degmada Spokane	$12.42	$12.42	$10.80	$10.80	$9.60
Qeybta 2-aad	$12.82	$12.82	$11.15	$9.97	$9.97
Qeybta 3-aad	$17.02	$17.02	$14.67	$12.91	$11.74
Qeybta 4-aad	$20.03	$20.03	$17.42	$14.67	$14.08
Qeybta 5-aad	$13.50	$13.50	$11.74	$11.15	$9.97
Qeybta 6-aad	$13.50	$13.50	$11.74	$11.74	$11.15

Xannaano Aan Shati Laga Rabin – Sicirka Saacaddii La bixiyo	
Cunugga Koowaad	$2.20
Carruurta dheeraadka ee qoys loo haynayo	$2.17

* Sicirka carruurta shan jirka ah ee dhigata fasalka iskoolka ka horreeya ee kindhar gaadhan.
**Sicirka carruurta iskoolka gaartay ee cunugga 5 jirka ah ee bilaabay kindhar gaadhan.

QORAALKA SHARRAXAADDA B
BARNAAMIJYADA DHAQAALE-KABISTA AH EE LOOGA HADLAYO HESHIISKAN GUUD

Liiska soo socda waxaa ku qoran barnaamijyada kabista ee xannaannada carruurta ee uu Heshiiskan ka hadlayo iyo kuwa kale ee aan Heshiiskan looga hadleyn.

Kharashka la daboolayo sida ku qoran Heshiiska

1. Xannaannada Carruurta ee waalidka Shaqo Lagu Meeleeyo (Xafiiska Caawimaadda Qaxootiga iyo Ajaanibka ee Shaqo-raadinta)
2. Xannaannada Xilliyeedka Carruurta
3. Qofka Lagu Shaqaaleeyey Xannaanada Carruurta ee Waalidiinta Carruuraha Korsada
4. Adeegyada Ilaalinta Carruurta
5. Adeegyada Danaha Carruurta

Waxyaabaha Uusan Heshiiskan ka Hadleyn

1. Xannaannada Carruurta ee qofka aan guri lahayn
2. Adeegyada Xannaannada iyo Qabashada Kumeelgaarka ah
3. Xannaannada Ka-nasinta ah ee Waalidiinta Carruur Korisa
4. Daaweynta iyo Xannaannada Carruurta
5. Adeegyada Dhaqaaleynta Carruurta Hindiga ah / Xannaannada Carruurta Qabiilada Hindiga ah
6. Qeybta Qaabbilsan La-qabsiga Shaqada
7. Qeybta Qaabbilsan Aalkolada iyo Walxaha Maanka Dooriya ee Sida Xun Loo Isticmaalo
8. Xannaannada Hadalka Daawada ah ee Carruurta
9. Tallaabooyinka Koowaad/Maamulka Caawimaadda Caafimaadka
10. Waaxda Gaashaandhigga

Labda dhinac waxay isku raacsan yihiin in la kulmo oo laga wada hadlo wixii ah barnaamijyada kabista ah ee xannaannada carruurta cusub iyo barnaamijyada xannaannada ah ee baddeli doona kuwa hadda jira iyo xaaladda ay hoos imaan doonaan heshiiska guud ee RCW 41.56.

LABADA DHINAC EE HOOSTA KU SAXIIXAN WAXA AY OGGOL YIHIIN OO AY AQBALEEN WAX KASTA OO KU CAD NIDAAMKA SHURUUDAHA HESHIISKAN OO AH MID GUUD AHAANEED.

Waxaa Loo diyaariyey Ururka Shaqaalaha Caalamiga ah ee 925:

Kim Cook Guddoomiyaha	Cathy McPeek
Karen Hart	Fatumo Mohamoud Ali
Ikran Ali Bana	Linda Ramuta
Antonia Alvarez	Terry Savadge
Sandra Conrad	Sherry Smiley
LaVonne Counley	Deborah Thurber
Barbara Frost	Sandra VanDoren
Nancy Gerber	Shawn Harris
Amelia Gil	Paula Hall

Waxaa Loo Diyaariyey Gobolka Washington

Christine O. Gregoire
Guddoomiyaha Gobolka

Jackie Marks
Madaxa Wada-hadalka Shaqaalaha,
Madaxa Xiriirka Shaqaalaha
Xafiiska Maamulka Dhaqaalaha